
SOMALI PUBLIC AGENDA WARBIXIN CILMIBAARIS NO. 18

# Qiimeyn Dakhliga Canshuurta ee Maamulka Gobolka Benaadir : Noocyada Canshuuraha, Qaab-dhismeedyada Sharci, Hababka Loo Qaado, iyo Adeeg Bixinta

**Farxaan Isxaaq Yuusuf | July 2025**






SOMALI PUBLIC AGENDA WARBIXIN CILMIBAARIS NO. 18

# **Qiimeyn Dakhliga Canshuurta ee Maamulka Gobolka Benaadir :** Noocyada Canshuuraha, Qaab-dhismeedyada Sharci, Hababka Loo Qaado, iyo Adeeg Bixinta

**Farxaan Isxaaq Yuusuf | July 2025**

Somali Public Agenda
Mogadishu - Somalia
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

© Somali Public Agenda 2025

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Marka laga reebo sawirada dhinac saddexaad uu qaaday, nuqulkan elektorooniga ah ee daabacaadan waxaa lagu heli karaa shatiga Creative Commons Attribution-NonCommercial-ShareAlike 3.0 (CC BY-NC-SA 3.0). Waxaad xor u tahay inaad nuqul ka daabacato, qeybiso oo gudbiso daabacaadda waase haddii aanay ganacsi ahayn, oo aad si habboon u sheegto daabacaadda, sidoo kalena aad ku faafiso shati lamid ah. Macluumaad intaas ka badan haddii aad rabtid, booqo shabakada Creative Commons: <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/3.0/>.

Somali Public Agenda

Mogadishu

Somalia

Tel: +252(0)85 8358

Email: info@somalipublicagenda.org

Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

Copyright © Sawirka Kore: Afaafka hore ee Xarunta Maamulka Gobolka Benaadir iyo Dowladda Hoose ee Xamar.
Isha Sawirka: Maamulka Gobolka Benaadir

Copyright © Sawirka Hoose: Haweeney boorsooyin ku iibineysa Suuqa Bakaaraha ee Muqdisho.
Sawirka waxaa qaaday Mary Harper, 2012.

Naqshadeynta: Asal Creative Design

Tifaftiraha: Peter Chonka

## Mahadnaq

Cilmibaaristan waxaa lagu sameeyay taageero ka timid National Endowment for Democracy (NED). Warbixinta waxaa tafatiray Peter Chonka (PhD), Bare Sare ee Global Digital Cultures ka dhiga King's College London sidoo kalena Fellow ka ah Somali Public Agenda. SPA waxa kale oo ay u mahadcelineysaa Maxamed Cabdiraxmaan Aadam (Agaasimaha SPA Forums), Ibraahim Jibriil (Cilmibaare katirsan SPA), Farxiya Maxamuud (Cilmibaare katirsan SPA), Cabdullaahi Yuusuf (intern hore ee SPA), Maxamed Xuseen (intern hore ee SPA), iyo Aamina Alinor Maxamed (intern hore ee SPA) oo kaalin mug leh ka qaatay xog uruurinta loo sameeyay cilmibaaristan.

## Ku saabsan Qoraaga

**Farxaan Isak Yusuf** waa Ku Xigeenka Agaasimaha Fulinta iyo Agaasimaha SPA Research. Sidoo kale waa Bare Sare ee Culuumta Siyaasadda. Farxaan waxa uu shahaadada BA iyo MSc ee Cilmiga Siyaasadda ka qaatay Jaamacadda Muqdisho iyo Jaamacadda Omdurman ee ku taalla magaalada Khartoum ee dalka Suudaan. Waxa uu khibrad dheer u leeyahay cilmibaarista iyo macallinnimada. Mowduucyada ugu waaweyn ee cilmibaarista ee uu xiiseeyo waxaa kamid ah dowladaha hoose, dimuqraadiyeynta, federaalaynta, iyo dib-u-heshiisiinta.

# Table of Contents


| | |
|---|---|
| Mahadnaq | iii |
| Ku saabsan Qoraaga | iii |
| Nuxurka Warbixinta | 1 |
| Hordhac | 4 |
| Habka Cilmibaarista Loo Sameeyay | 7 |
| Dulmar Kooban ee Marxaladihii Dakhli Uruurin ee Maamulka Gobolka Benaadir | 9 |
| Noocyada iyo Ilaha Dakhli ee Maamulka Gobolka Benaadir | 11 |
| Kharashaadka Maamulka Gobolka Benaadir | 15 |
| Qaab-dhismeedyada Sharci ee Dakhli Uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir | 17 |
| Wacyiga Dadweynaha ee Canshuuraha Maamulka Gobolka Benaadir | 19 |
| Qaababka Isgaarsiin ee Canshuurta Maamulka Gobolka Benaadir | 20 |
| Hab-dhaqanka Canshuur-Uruuriyeyaasha iyo Fal-celinta Bulshada | 23 |
| Hababka Canshuur Bixinta | 27 |
| Caqabadaha Heysta Canshuur Uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir | 30 |
| Gunaanad | 33 |
| Talooyin Tixgelin Mudan | 34 |
| Tixraac | 37 |

# Nuxurka Warbixinta

Guud ahaan dowlad-dhiska—gaar ahaanna hab-raacyada maamul maaliyadeed—ayaa ahaa tiirka ugu muhiimsan ee dadaallada dowlad-dhiska Soomaaliya. Waxaa si buuxda u taageerayay oo u ololeeynayay deeq-bixiyeyaasha caalamka tan iyo markii uu dalka u gudbay dowlad rasmi ah sanadkii 2012, iyo nidaam federaal, kadib sanado badan oo dowlado kumeelgaar ah ay soo jireen sanadkii 2000 ilaa 2012. Inkastoo dadaalladan ay ahaayeen kuwo tartiib tartiib u socday, haddana waxaa ka dhashay natiijooyin la mahdiyay, maadaama ay horseedeen ansixinta xeerar iyo nidaamyo la xiriira maareynta maaliyadda dowladda, heer federaal iyo heer dowlad-goboleedba, taasoo kor u qaadday dakhli uruurinta iyo isla-xisaabtanka.

Sikastaba ha ahaatee, Maamulka Gobolka Benaadir —oo ah halka ay ku nool yihiin dadka ugu badan ee dalka (in ka badan 2 milyan oo qof), ah xarunta dowladda federaalka, iyo goobta ugu weyn ee ay adeegyada ka helaan dadka ka kala yimaada gobollada kala duwan ee dalka—ayaysan u suuroobin dadaallada dowlad-dhiska , gaar ahaan kuwa maamulka maaliyadda. Dadweynaha tirada badan iyo dhaqdhaqaaqyada ganacsi ee badan ayaa muujinaya in la uruurin karo dakhli aad u ballaaran, waxaa sidoo kale jirtay dakhli uruurin—si tartiib ah kor ugu kaceysay—tan iyo markii la dhisay dowladdii federaalka ee kumeelgaarka ahayd ee uu hogaaminayay Cabdullaahi Yuusuf Axmed. Sikastaba ha ahaatee, waxaa jirta daah-furnaan aad u xaddidan ee dakhliga uu soo xareeyo gobolka, ma jiraan wax la taaban karo oo adeeg-bixin ah oo lagu beddelo canshuurta la uruuriyo, waxaa sidoo kale cajiib ah in aysan jirin wax isla-xisaabtan ah oo ku saabsan halka lacagta ay ku baxdo.

Sidoo kale, waxaa aad u yar doodaha dadweyne ee la xiriira maareynta maaliyadda ee Maamulka Gobolka Benaadir, waxaana sidoo kale aad u yar baaqyada ah in maamulka ay la xisaabtami karaan dadka deegaanka. Doodihii muhiimka ahaa ee loo baahnaa in ay dhacaan waxaa bedelkeeda diiradda la saaray dardargelinta go'aaminta maqaamka gobolka Benaadir, kaasoo hoos joogaya dowladda federaalka inta ay labada aqal ee baarlamaanka ka go'aaminayaan maqaamka gobolka. Sikastaba ha ahaatee, doodaha la xiriira maqaamka caasimadda ayaa mar-mar soo ifbaxa, waxaana la aaminsan yahay in ay siyaasado riixayaan iyadoo la iska idha-tiro baahida dhabta ah ee maamul—mid maaliyad ama mid kaleba. Xaaladda hadda jirta kama hortaagna in Maamulka Gobolka Benaadir loo dhiso habab maamul maaliyadeed, xitaa iyadoon la go'aamin maqaamka. Waxa ay kaliya u baahan tahay wacyigelin iyo abaabul canshuur-bixiyeyaasha ah si ay u dalbadaan isla-xisaabtan ku aaddan lacagta laga qaaday.

Somali Public Agenda waxay sameysay cilmibaaris qoto-dheer oo sahmisay dakhliga uu Maamulka Gobolka Benaadir uruuriyo, iyadoo si gaar ah diiradda u saartay noocyada iyo ilaha dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir, qaab-dhismeedyada sharci ee lagu jaangooyo uruurinta dakhliga, habka gaarsiinta dadweynaha ee canshuuraha, dhaqanka shaqaalaha canshuurta uruuriya ee Maamulka Gobolka Benaadir iyo hab-fikirka dadweynaha, hababka iyo qaababka bixinta canshuuraha, caqabadaha haysta canshuur uruurinta, iyo ilaha meelaha lagu bixiyo dhakhliga la uruuriyay.

Cilmibaaristu waxay soo saartay natiijooyin muhiim ah oo la xiriira arrimaha la falanqeeyay, kuwaas oo ay ka mid yihiin—laakiin aan ku koobnayn—qodobadan soo socda:

- Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu sanadkii 2007-dii billaabay uruurinta dakhliga gobolka, markaas oo Dowladda Federaalka Kumeelgaarka ah ay ka soo guurtay Baydhabo unasoo wareegtay caasimadda Muqdisho. Tan iyo markaas, dakhliga uu uruuriyo Maamulka Gobolka Benaadir ee hoos imaanayay maayaradii isbedbedlayay waxa uu si tartiib-tartiib ah uga kordhayay baaxadda iyo cabirka intaba, taasoo la jaanqaadeysay xaaladda amni ee caasimadda.
- Waxaa jira 13 ilo-dakhli canshuureed oo ka jira gobolka. Waxyaabaha xiisaha leh ee cilmibaaristu ogaatay waxaa ka mid ah in toddobo xafiis oo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ay masuul ka yihiin uruurinta canshuuraha ilahaas kala duwan. Sikastaba ha ahaatee, waaxaha iyo xafiisyada Maamulka Gobolka Benaadir si toos ah canshuuraha shacabka ugama qaadaan. Waxaa qandaraas lala galay labo shirkadood oo gaar loo leeyahay si ay u uruuriyaan canshuurta adeegyada maamulka dhulka iyo canshuuraha hantida maguurtada ah waxa ayna helayaan boqolleey cayiman oo ka mid ah dakhliga ay uruuriyaan.
- Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu dakhli ahaan u uruuriyay $47 milyan sanadkii 2023 iyo $58.5 milyan sanadkii 2024, marka laga reebo deeqaha, iyo mashaariicda waxaana la filayaa in sanad-miisaaniyadeedka 2025 dakhligaasi laba-laabmo.
- Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu ku shaqeeyay miisaaniyad sanadle ah oo lagu qiyaasay $68 milyan sanadkii 2024, iyadoo 85% oo ka mid ah miisaaniyaddaas loo qoondeeyay kharashaadka joogtada ah—gaar ahaan mushaarka shaqaalaha Maamulka Gobolka Benaadir oo lagu qiyaaso inta u dhexeysa 3,000 ilaa 3,400 oo shaqaale, kuwaasoo mushaarkooda bishii yahay qiyaastii $1.3 milyan (taasoo sanadka noqoneysa $15.6 milyan).
- Cilmibaaristu waxay ogaatay in Maamulka Gobolka Benaadir uusan ku howlgelin wax qaab-dhismeed sharci ah—ha noqoto mid ay sameeyeen dowladihii hore ama mid uu ansixiyay baarlamaanka federaalka—taasoo sharciyeyneysa uruurinta dakhliga canshuuraha. Taas beddelkeeda Maamulka Gobolka Benaadir ayaa ku shaqeeya awaamiirta uu bixiyo duqa magaalada ama guddoomiyaha gobolka ee xilka haya.
- Dadka deegaanka waxba kama oga jiritaanka wax sharciyad ah oo u oggolaanaya in Maamulka Gobolka Benaadir uu uruuriyo canshuuraha uu hadda ka qaado gobolka. Waxa aysan sidoo kale la socon noocyada canshuur ee uu uruuriyo Maamulka Gobolka Benaadir, mana ay kala saari karaan haddii Maamulka Gobolka Benaadir ama Wasaaradda Maaliyadda ee Federaalka ay masuul ka tahay canshuurta la uruurinayo. Tani waxaa ugu wacan maqnaanshaha xogta ay dadweynuhu heli karaan oo la xiriirta canshuurta.
- Dadka deegaanka waxay cabasho xooggan ka muujiyeen tacaddiyada ay kala kulmaan shaqaalaha canshuurta uruuriya iyo booliska la socdo. Waxay nala wadaageen sheekooyin murugo leh, oo ay ka mid yihiin in kiraystayaal si khasab ah looga saaray guryahooda si ay u bixiyaan canshuuraha hantida sanadlaha ah oo aanan ku waajibin. Waxa kale oo ay sheegeen in aysan jirin meel ay u gudbiyaan cabashooyinkooda ku aadan sida xun ee loola dhaqmo.

- Cilmibaaristu waxay tilmaantay caqabado dhowr ah oo hortaagan uruurinta dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir. Waxaa kamid ah balse aan ku koobneyn: maqnaanshaha sharci hagaya canshuurta la qaado; tartanka loogu jiro canshuur uruurinta ee hay'adaha dowladda federaalka sida NISA iyo booliska; wacyi-gelin la'aan dadweyne; maqnaanshaha nidaamka maareynta maaliyadda dowladda; jiritaan la'aanta hal xafiis oo masuul ka ah canshuur uruurinta; iyo dhibaatooyin ka dhasha xirnaanshaha waddooyinka oo ay sababaan ciidamada ammaanka dowladda federaalka.

Cilmibaaristu waxay soo jeedinaysaa talooyin ay kamid yihiin:

- **In Maamulka Gobolka Benaadir uu shaaciyo xogta maaliyadda** si dadweynuhu u helaan. Tani waxaa kamid ah faahfaahin ku saabsan noocyada canshuurahaa iyo heerka mid walba, cidda laga doonayo inay bixiso, inta jeer ee la bixinayo, iyo hababka lacag-bixinta ee la oggol yahay. Waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu sidoo kale si bille ama sanadle ah uu joogto ugu daabaco tirada dakhliga canshuuraha, siyaabaha lacagta loo isticmaalay, iyo sababaha habkaas loogu isticmaalay.

- **Waa in uu Maamulka Gobolka Benaadir dhisaa nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladda** (Public Financial Management – PFM) si uu u nidaamiyo habraacyada dakhli uruurinta iyo kharash-bixinta. Tani waxa ay kordhineysaa dakhliga soo xaaroonaya iyo isla-xisaabtanka iyadoo sahleysa in si hufan loola socdo lacagaha lasoo xareeyo iyo isticmaalkooda.

- **Maamulka Gobolka Benaadir waa in uu sameeyaa hal xafiis oo dhexe** oo mas'uul ka ah uruurinta dakhliga canshuurta, iyadoo la beddelaayo qaab-dhismeedka kala firdhisan ee hadda jira oo isugu jira waaxyo badan oo aan isku xirneyn iyo shirkado gaar loo leeyahay.

- **Waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu wax-ka-qabto tabashooyinka** ka imaanaya dadka deegaanka ee ka dhanka ah dhaqan-xumada ay ku kacaan canshuur uruuriyeyaasha iyo booliska la socda. Waa in maamulka uu u xilsaaraa shaqaale si ka-fiirsasho leh loo soo xulay oo tababaran si ay u muujiyaan anshax & xirfad marka ay canshuurta uruurinayaan. Waa in xafiis cabashada u gaar ah la sameeyaa, waana in tallaabo ciqaabeed laga qaado xadgudbeyaasha. Shaqsiyaadkan kaliya ma dhibaateeyaan muwaadiniinta balse sumcadda maamulka ayay dhaawacaan.

- **Waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu billaabo wacyigelin iyo olole dadweyne oo wax-ku-ool ah** iyadoo diiradda lagu saarayo dadka deegaanka ee la dhibaatoonaya aqoon yarida ka heysata canshuurta. Tani waxa ay yareyneysaa macluumaad yarida waxa ayna xaddideysaa fursadaha ay canshuur uruuriyeyaashu ku xumeyn lahaayeen xaallada. Sidoo kale, waxay gacan ka geysan doontaa dhisidda is-aamin iyo xiriir wanaagsan oo ka dhexeeya dadweynaha iyo maamulka.

# Hordhac

Gobolka Benaadir waxa uu kamid yahay sideed iyo tobankii gobol ee jiray ka hor 1991-kii; waxaa sidoo kale la micno ah Muqdisho, caasimadda Soomaaliya iyo xarunta Dowladda Federaalka Soomaaliya. Gobolka Benaadir waxaa loo kala qaybiyay saddex gobol bishii Juun 1974 iyadoo loo marayo Xeer Lr. 23, kaasoo dhaqan galay bishii Janaayo 1975-kii kadib markii xukunkii milateriga uu sameeyay gobollada Shabeellada Dhexe iyo Shabeellada Hoose. Meeshii juquraafi ahaan loo yaqaanay Muqdisho ayaa noqotay gobolka Banaadir. Sidaas darteed, Benaadir—inkastoo uu yahay gobolka ugu dadka badan Soomaaliya, iyadoo dadkiisu ka badan yahay labo milyan—haddana waa kan ugu baaxad yar siddeed iyo tobankii gobol ee jiray ka hor 1991.

Markii uu xukunkii milateriga dhacay bishii Janaayo 1991-kii, gobolka Benaadir waxa uu lahaa 16 degmo. Tirada ayaa noqotay 17 kadib markii degmada Kaxda loo aqoonsaday degmo rasmi ah sanadkii 2012-kii. Hadda, gobolka Benaadir waxa uu maamul ahaan ka kooban yahay 20 degmo, saddex ka mid ah—Gubadleey, Daarusalaam, iyo Garasbaaleey—ayaa ah kuwii ugu dambeeyay ee lagu kordhiyay, kuwaas oo loo dalacsiiyay heer degmo 20-kii May 2024-kii, iyadoo loo marayo digreeto uu soo saaray Madaxweynaha Federaalka Xasan Sheekh Maxamuud (VOA, 2024). Degmooyinkan cusub ee la soo kordhiyay waxa ay ku yaallaan daafaha gobolka Benaadir. Aqoonsigooda waxa uu yimid iyadoo loo maray soo-jeedin ka timid Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka, iyo Dib-u-heshiisiinta loona gudbiyay Xafiiska Madaxweynaha si loo ansixiyo.

Marka lagasoo tago kordhinta tirada degmooyinka, gobolka ayaa sidoo kale la kulmay koror joogto ah oo ku yimid dadka dega. Waa gobolka keliya ee ugu dadka badan Soomaaliya. Inkastoo uusan jirin tirakoob rasmi ah oo dadweyne, qiyaasaha taxaddarka leh waxa ay tirada dadka gobolka Benaadir ku sheegayaan qiyaastii labo milyan (Elmi & Ali, 2024). Tani waxay ka duwan tahay sheegashada maamulka gobolka oo ah in tirada dadka gobolka ay ka badan tahay 3.5 milyan, taas o ah tiro ka badan (inkastoo ay la mid tahay sheegashooyinka maamullada kale ee siyaasadeed ee dalka oo dhan). Kala-fogaanshaha xogta ayaa sababay daneyn badan iyo khilaaf. Marka lagasoo tago tirada saxda ah ee dadweynaha, ku badnaashaha dadka ee gobolka ayaa ka turjumeysa in uu jiro dhaqdhaqaaq ganacsi oo xooggan iyo faa'iido dakhli oo la taaban karo marka loo bar-bar dhigo dowlad-goboleedyada oo ay dadkoodu yaryihiin.

Sikastaba ha ahaatee, Maamulka Gobolka Benaadir ayaa weli ah maamulka kaliya ee ka baxsan nidaamka federaalka—marka laga reebo Somaliland, oo si iskeed ah isugu aqoonsatay jamhuuriyad gooni u taagan. Tani waxaa u sabab ah dastuurka kumeelgaarka ah ee federaalka, kaasoo dhigaya in go'aaminta maqaamka gobolka lagu saleeyo sharci gaar ah oo ay ansixiyaan labada aqal ee baarlamaanka federaalka, taasoo aanan weli la hirgelin. Tani waxa ay u oggolaatay Dowladda Federaalka Soomaaliya, gaar ahaan madaxweynayaashii federaalka ee kala dambeeyay, inay magacaabaan jagooyinka muhiimka ah ee Maamulka Gobolka Benaadir —sida guddoomiyaha & duqa magaalada iyo ku-xigeennadooda—iyagoo si gaar ah u xulanaya shaqsiyaad aan loo eegin danaha dadka deegaanka. Intaa waxaa dheer, maqaamka gobolka ee aan weli la caddeyn ayaa dowladda federaalka siisay awood dheeraad ah oo ay ku maamusho

go'aannada siyaasadeed ee muhiimka ah sida caafimaadka iyo waxbarashada, marka la barbardhigo dowlad-goboleedyada kale ee leh awoodaha maareynta adeegyadaas.

Sidoo kale, maqaamka Muqdisho oo aan caddeyn ayaa dowladda federaalka fursad u siiyay in ay joogteyso gacan-ku-heynta ilaha dakhli ee muhiimka ah ee gobolka—sida dekedda Muqdisho iyo Garoonka Diyaaradaha. Waa ilaha dakhliga gudaha kaliya oo ay dowladda federaalka leedahay, maadaama aysan jirin marin ay dowladda federaalka u leedahay ilaha dakhliga gudaha ee ay inta badan gacanta ku hayaan dowlad-goboleedyada. Xaaladdan waxaa u sabab ah khilaafka baahsan ee u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyada, taasoo wiiqday fursadaha lagu gaari karo heshiis wadajir ah oo ku saabsan awoodaha maaliyadeed ee dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada.

Maareynta Muqdisho ee dowladda federaalka ee dheeraatay waxaa lagu fasiri karaa inay saldhig u yihiin siyaasad iyo maaliyad—labo arrimood oo muhiim ugu ah si gaar ah dowladda federaalka kana dhigi kara mid nugul haddii ay ka tanaasusho maamulka gobolka iyadoo aan la xalin arrimaha maaliyadeed ee federaalka iyo inay aqoonsi rasmi ah ka hesho hogaamiyeyaasha dowlad-goboleedyada. Waqtigan la joogo, gobolka waxa weli loo arkaa inuu yahay meesha keliya ee ay dowladda federaalka si toos ah ugu leedahay awood maamul iyo dakhli gudaha ah, taas oo muhiim u ah miisaaniyadda dowladda federaalka.

Sikastaba ha ahaatee, maqaam la'aanta Muqdisho ayaa maamulka gobolka waxa ay ka dhigtay mid aan lahayn madax-bannaani siyaasad-dejin, gaar ahaan jiritaan la'aanta doorashooyin heer degaan oo ay shacabku codkooda ugu dooran kareen hogaankooda halkii ay soo magacaabi lahaayeen dowladda federaalka. Waxaa iyadana muhiim ah in maamulka gobolka ay kaliya la xisaabtami karaan dowladda federaalka, gaar ahaan madaxweynaha xilka fadhiya oo magacaaba hogaanka Maamulka Gobolka Benaadir.

Saameyn kale oo ay xaaladdani leedahay ayaa ahayd—oo welina ah—dib-u-dhaca ku yimid dhisidda qaab-dhismeedka maamul ee gobolka, sida maamul maaliyad, kaasoo ay deeq-bixiyeyaasha ka taageeraan dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada. Dadaalladan ayay ujeedkoodu ahaayeen in la dhiso aasaaska qaab-dhismeedyo sharciyeed iyo nidaamyo muhiim u ah Maareynta Maaliyadda Dowladda.

Marka arrinkan laga yimaado, si ka duwan dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu ku howlan yahay dhakhli uruurin isagoo aan haysan kaabayaal nidaamsan. Intaa waxaa dheer, ma jiraan ama wey yaryihiin macluumaad dadweyne oo ku saabsan noocyada iyo lacagaha dakhli ee uu Maamulka Gobolka Benaadir uruuriyo, sharciyadda ay ku dhisan yihiin canshuurahan, nidaamyada loo adeegsado uruurinta, ama sida loo isticmaalo dakhliga.

Dhinaca kale, waxaa aad u yar dalabka dadweynaha ee ku aaddan in nidaam maamul maaliyadeed loo dhiso Maamulka Gobolka Benaadir. Sidoo kale, waxaa jirta daneyn aad u yar oo ay warbaahinta gudaha siiyeen arrimaha ku saabsan maamulka maaliyadeed iyo isla-xisaabtanka Maamulka Gobolka Benaadir. Doodaha dadweynaha ee ku saabsan Maamulka Gobolka Benaadir waxay ku dul wareegaan siyaasadda halkii ay maamul ahaan lahaayeen,

maadaama kooxaha muhiimka ah ee bulshada ka tirsan—sida siyaasiyiinta, odayaasha, iyo waxgaradkuba—ay diiradda saaraan go'aaminta xaaladda siyaasadeed ee dalka. Sikastaba ha ahaatee, dadaalladan ayaa badanaa ah kuwo kedis ah, siyaasad ku dhisan, aanan lahayn dadaal isku-duuban.

Tani waxa ay qayb ahaan sababtay in ay sii socoto xaaladdii hore, oo ay kaliya ka faa'iidaystaan dowladda federaalka iyo hogaanka Maamulka Gobolka Benaadir. Shaqsiyaadkan ayaa si madax-bannaan u maamula dakhliga gobolka Benaadir, iyagoo aan wajaheyn wax isla-xisaabtan ah.

Daraasaddan waxaa loo sameeyay in lagu baaro dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir, iyadoo si gaar ah diiradda loo saaraayo noocyada iyo ilaha dakhliga, qaab-dhismeedka sharci ee lagu saleeyo dakhli uruurinta, hababka gaarsiinta xogta la xiriirta canshuurta Maamulka Gobolka Benaadir, hab-dhaqanka canshuur uruuriyeyaasha iyo sida uu dadweynuhu u arko, hababka iyo dhaqdhaqaayada canshuur bixinta, caqabadaha ka yimaada canshuur uruurinta, iyo isticmaalka dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir. Ujeedada daraasadda waa in ay taageertaa dadaallada Maamulka Gobolka Benaadir loogu dhisaayo maamul maaliyadeed waxtar leh iyadoo siineysa talooyin salka ku haya xog aas-aasi ah oo si cilmiyeysan loo soo uruuriyay. Intaa waxaa dheer, waxa ay ku kordhineysaa qoraallada ku saabsan canshuurta Soomaaliya iyadoo bixineysa fikrado ku qotoma cadeymo la xiriira canshuurta Maamulka Gobolka Benaadir —oo ah mowduuc aan sida aan ognahay weli laga sameyn cilmibaaris qoto-dheer ee lagu saleeyay xog dadweyne oo ay dadka daneeyana heli karaan.

# Habka Cilmibaarista Loo Sameeyay

Cilmibaaristan waxay adeegsatay hab cilmibaariseed tayo ku saleysan waxa ayna aalado xog-uruurineed ahaan u adeegsatay wareysiyo dad xog-ogaal ah iyo wareysi-kooxeedyo. Ujeeddooyinka daraasadda iyo su'aalaha ugu muhiimsan ee cilmibaarista ayaa hagay xulashada habka cilmibaarista iyo xog aruurinta. Maadaama daraasadda ay ku koobnayd Maamulka Gobolka Benaadir, shan degmo oo ka mid ah 20-ka degmo oo kala ah Hodan, Howlwadaag, Xamar Weyne, Waaberi, iyo Yaaqshiid ayaa la doortay. Xog uruurinta waxay dhacday intii u dhexeysay 17-kii Noofembar 2024 ilaa 26-kii Febraayo 2025.

Sababta degmooyinkan loo doortay ayaa ahayd in ay yihiin xarumo dhaqaale oo muhiim ah oo ku yaalla gobolka Benaadir, iyadoo ay ku yaallaan suuqyo waaweyn sida Suuq Bacaad oo katirsan degmada Yaaqshiid, Suuqa Barkaara oo katirsan degmada Howlwadaag, iyo Suuqa Hamar Weyne oo katirsan degmada Hamar Weyne. Sidoo kale, degmooyinkan waxaa u nool dad tiro badan, waana xarumo muhiim u ah adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada, waxay leeyihiin dhismayaal dabaqyo sii kobcaya, sidoo kalena waxa ay leeyihiin amni hagaagsan.

Kahor xog uruurinta, waxaan 25-kii Agoosto 2024 qabannay wareysi-kooxeed hordhac ah oo socday 90 daqiiqo, iyadoo la isugu keenay 10 ka-qeybgale oo isugu jiray aqoonyahanno khabiir ku ah arrimaha maaliyadda dowladda, khubaro dhanka maaliyadda ah, khubaro dhanka sharciga ah, iyo ganacsato. Ujeedka waxa uu ahaa in la isla fahmo arrimaha ugu muhiimsan ee canshuur uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir. Iyadoo arrinkan lagu saleynaayo, waxaan diyaarinnay su'aalo loogu talo galay wareysiyada lala yeelanayo dadka xog-ogaalka ah iyo wareysi-kooxeedyada si loo helo aragtiyo la xiriira mowduuca. Su'aalo ayaa loo diyaariyay koox kasta oo ay quseyso, waxaana lagasoo saaray toddobo su'aal oo si gaar ah loogu adeegsaday dood-kooxeedyada.

Si loo fududeeyo xog uruurinta, waxaan degmo kasta ka soo xulnay dad deegaanka ah oo sumcad leh, xiriiro wanaagsanna leh, islamarkaana aqoon u leh bulshada. Dadkan ayaa naga caawiyay casuumaadda ka-qeybgalayaasha wareysi-kooxeedyada iyo qaban-qaabinta wareysiyada xog-ogaaleed. Kadibna xog uruurinta ayaa si is xig-xigta looga sameeyay shanta degmo.

Intii lagu guda jiray xog uruurinta, 146 qof ayaa ka qeyb galay wareysi-kooxeedyada shanta degmo lagu qabtay, kuwaas oo 72 kamid ah ay haween ahaayeen. Tiradan ayaa saddex qof uun ka yaraa tiradii bartilmaameedka ahayd ee 150 ka-qeybgale wareysi-kooxeed. Isla waqtigaas, waxaa la qabtay 23 wareysi xog-ogaaleed oo lala yeeshay dad ka tirsan degmooyinka daraasadda laga sameeyay, wakiillo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir, iyo aqoonyahanno iyo khubaro ka shaqeeya maaliyadda dowladda. Kaliya labo kamid ah xog-ogaallada ayaa haween ahaa, taasoo muujinaysa sida raggu ugu badan yihiin jagooyinka dowliga ah iyo kuwa tacliinta sare.

Dhammaan wareysi-kooxeedyada waxaa duubay cilmibaareyaasha SPA kadib markii ka-qeybgaleyaasha lagu wargeliyay ujeedooyinka daraasadda, ujeedka adeegsiga xogta iyo damaanad-qaadka qarinta magaca marka la qorayo codka iyo warbixinta. ka-qeybgaleyaasha waxa ay bixiyeen oggolaansho ay xog-ogaal u yihiin oo cod-duubis ah. Tani waxa ay

suuragelisay diiwaangelin dhameystiran oo aragtidooda ah. Sidaas si lamid ah, wareysiyada xog-ogaaleed badankooda waa la duubay, marka laga reebo xaalado yar. Dhamaan xogta—cod ama qoraallo—waxaa lagu keydiyay qaab online ah, oo ay kaliya heli karaan kooxda cilmibaareyaasha ku howlan xog uruurinta iyo qoraal-u-bedelidda codka.

Kadib xog uruurinta, dhammaan cod duubisyadii qoraal ayaa loo beddelay iyadoo laga taxadarayo in la ilaaliyo aragtida ka-qeybgaleyaasha, sidoo kalena laga saaraayo macluumaad walba oo aqoonsi muujinaya. Kadibna xogta ayaa la falanqeeyay.

Cilmibaaristu waxay la kulantay caqabado dhowr ah. Ugu horreyn, waxaa jira qoraallo xaddidan oo ku saabsan dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir, mana uusan jirin xog la heli karay oo ku saabsan Maamulka Gobolka Benaadir, taasoo ahaan lahayd mid waxtar leh. Midda labaad, waxaa nagu adkaatay in aan wareysiyo la yeelano duqa magaalada iyo ku-xigeennadiisa, taasoo ka dhigan in aanan helin aragtidooda ku aadan arrimahan muhiimka ah. Midda saddexaad, metelaadda haweenka ee wareysi xog-ogaaleedyada aad ayay u yareyd, inkastoo ay haweenka si la mid ah ragga uga qeybgaleen wareysi-kooxeedyada. Haween badan oo ay cilmibaarayaasha la xiriireen si wareysi looga qaado ayaa ka gaabsaday inay ka qeyb qaataan daraasadda, haweenkaas aanan ka qeyb qaadan daraasadda ayaa u badnaa kuwo katirsan ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha dowladda.

# Dulmar Kooban ee Marxaladihii Dakhli Uruurin ee Maamulka Gobolka Benaadir

Horumarrada siyaasadeed, amni iyo maamul oo dalka ka dhacayay muddo ka badan labaatan iyo shan sano waxay saameyn ku yeelatay dib-u-billaabidda iyo dib-u-habeynta dakhli uruurinta, inkastoo heerarka saameyntu kala duwanaayeen. Gobolka Benaadir kama marneyn; taas beddelkeeda, waxa uu ahaa xarunta hormarradaan ka dhacayeen, maadaama ay ku yaallaan hay'adaha dowladda uuna ahaa bartilmaameedka ugu weyn ee jileyaasha awoodda ku loollamayay. Sida uu inooga warbixiyey mas'uul ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir, isbeddellada siyaasadeed iyo kuwa amni ee dhacay waxa ay si toos ah u muujiyeen kobaca dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir, baaxadda iyo tirada labadaba. Horumarka laga sameeyay dakhli uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir ayaa waxay si toos ah ula xiriirtaa horumarka joogtada ah ee ay samaynayeen dowladihii is xig-xigay iyo xasilloonida amniga tan iyo 2008-dii.

Duqa magaalada iyo guddoomiyeyaashii xilka soo qabtay ayaa doorar kala duwan ka qaatay dib-usoo-nooleynta iyo ballaarinta ilaha dakhliga maamulka. Sida ay sheegayaan ilo-wareedyo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir oo cilmibaarista lagu wareystay, duqii iyo guddoomiyihii ugu horreeyay ee dakhli uruurin ka billaabay gobolka Benaadir wuxuu ahaa marxuum Maxamed Cumar Xabeeb, "Maxamed Dheere", kaasoo xilka hayay intii u dhexeysay Abriil 2007 ilaa Sebteembar 2008-dii xilligii Dowladdii Kumeelgaarka ee uu hoggaaminayay marxuum Madaxweyne Col. Cabdullaahi Yuusuf Axmed (2004–2008). Sikastaba ha ahaatee, gobolka wuxuu la daalaa-dhacayay xaaladda amni oo cakiranayd xilligaas, taasoo caqabad weyn ku ahayd dadaalladaas, waxaana jiray mucaarad xooggan oo lagala hor yimid dowladdii kumeelgaarka iyo awoodda xaddidan ee ay ku lahayd guud ahaan gobolka Benaadir.

Duqii hore ee Muqdisho, Maxamed Nuur Tarsan (2010 ilaa 27 Febraayo 2014), ayaa sii waday dadaalladii lagu hawlgelinayay nidaamka canshuur uruurinta. Mas'uul ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa sheegay in Tarsan uu billaabay uruurinta canshuuro tiro yar balse muhiim ah, oo laga qaadayay gaadiidka, suuqyada xoolaha, iyo suuqyo tiro yar oo xilligaas ay dowladdu maamuleysay.[1] Horumarkaasi xaddidan ee laga sameeyay canshuur uruurinta wuxuu ka turjumayay awoodda xaddidan balse koreysa ee ay dowladda lahayd. Sikastaba ha ahaatee, khatarta shaqaalaha canshuur uruurinta, oo ay ku jiraan booliska, ayaa ahayd mid aad u sarreysa.

Maamulladii xigay waxay ku guuleysteen inay kordhiyaan ilaha dakhliga, baaxad iyo tiro ahaanba. Tusaale ahaan, Duqa magaalada Xasan Maxamed Xuseen (Muungaab), oo xilka hayay intii u dhexeysay Febraayo 2014-kii ilaa Oktoobar 2015-kii, oo markale dhawaan la magacaabay, Maajo 2025, ayaa billaabay uruurinta canshuurta guryaha, iyo lacagaha ruqsadaha iyo diiwaangelinta muwaadiniinta.[2]

1 Wareysi lala yeeshay sarkaal sare oo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir, Muqdisho, Janaayo 19, 2025.

2 Ibid.

Sida lagu faahfaahin doono qeybta xigta, Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu la kulmay ballaarin ku timid ilaha dakhliga, gaar ahaan dakhliga canshuuraha. Tani waxaa sabab u ahaa horumar ku yimid amniga guud ee gobolka Benaadir, oo u suurageliyay maamulka inuu gaarsiiyo uruurinta canshuuraha degmooyinkii uu horey u gaari waayay sababo amni darteed.

# Noocyada iyo Ilaha Dakhli ee Maamulka Gobolka Benaadir

Maamulladii Gobolka Benaadir ee is-xig-xigay ayaa dakhli kala leh heerer iyo saami kala duwan ka uruuriyay gobolka tan iyo markii la dhisay hay'adaha dowladda ee dalka. Waxay la kulmeen koror joogto ah oo ku yimid uruurinta dakhliga baaxad iyo tiroba, iyadoo la jaan-qaadeysay xaaladaha amni ee soo hagaagayay. Arrintan ayaa sidoo kale waxaa sameynayay dowladda federaalka, taasoo kordhisay dakhliga gudaha, oo badankiis ka yimaada gobolka Benaadir. Sikastaba ha ahaatee, Maamulka Gobolka Benaadir qaab furan ugama warbixiyo ilahiisa dhakhli, nuucyada canshuuraha, iyo saamiga canshuuraha—si ka duwan qaabka ay dowladda federaalka sameyso, iyadoo xogtan oo kale ku daabacda miisaaniyadda sanadlaha ah iyo warbixinnada maaliyadeed ee laga heli karo bogga Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka.

Iyadoo aanan si furan loo heli karin xogaha muhiimka ah ee ku saabsan canshuurta—xogtaasoo lagama maarmaan u ah hufnaanta iyo isla-xisaabtanka—qeybtan waxa aan ku gorfeyneynaa ilaha iyo noocyada dakhliga ee Maamulka Gobolka Benaadir iyo waaxyaha masuulka ka ah il kasto oo dakhli. Qeybtani waxay si gaar ah ugu tiirsan tahay xog laga helay masuuliyiin ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir oo wareysi lala yeeshay, maadaama aysan jirin xog dheeraad ah oo buuxin karta gaabiska xogeed.

Ilo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir oo xog ogaal u ah uruurinta dakhliga ayaa sheegay in dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir loo kala saaro saddex ilood: canshuuro, dakhli ka yimaada adeegyo, iyo deeq. Si loo kala caddeeyo loona helo tixraac fudud, waxaan jadwalka hoose ku soo bandhignay noocyada canshuuraha uu Maamulka Gobolka Benaadir uruuriyo. Liiskan ma ahan mid dhamaystiran, maadaama aanan helin dukumentiyo rasmi ah oo arrintan caddeynaya, sidoo kalena dadka aan ka wareysannay Maamulka Gobolka Benaadir aanay dukumintiyada qeexaya ilaha dakhli nala wadaagin.

**Jadwal**: jadwalkan wuxuu muujinayaa ilaha dakhli ee Maamulka Gobolka Benaadir, iyo tusaalooyin dakhliga canshuuraha ee mid walba oo kamid ah ilahan

| No | Ilaha Dakhli | Tusaalooyin canshuurta dakhli ee il kasta |
|---|---|---|
| 1 | Maareynta dhulka | Waxay isugu jirtaa adeegyada sida oggolaanshaha dhismaha, bedelidda lahaanshaha dhul lumay, wareejinta dhulka, diiwaangelinta dhul cusub, iyo xallinta khilaafaadka dhulka. |
| 2 | Suuqyada | Canshuurta waxaa laga qaadaa suuqyada xoolaha, waratada, iyo kawaannada |
| 3 | Hantida maguurtada | Waxaa laga qaadaa dadka hantida maguurtada leh waxaana loo xisaabiyaa iyadoo lagu saleynaayo nooca iyo cabirka hantida maguurtada ah. |
| 4 | Shatiga | Khidmaha looga baahan yahay ganacsiyada iyo shirkadaha. |

| No | Ilaha Dakhli | Tusaalooyin canshuurta dakhli ee il kasta |
|---|---|---|
| 5 | Ganaaxa | Waxaa laga qaadaa kuwa aan u hoggaansamin bixinta canshuurta, wasakhda jidka ku shuba, iyo sameeya ficil liddi ku ah sharciyada magaalada |
| 6 | Khidmaha shahaadada caafimaadka | Waxaa la siiyaa shaqaalaha maqaayadaha, timo-jareyaasha, iyo kawaannada. |
| 7 | Canshuurta Dekedda ee dowladda hoose | Waxaa laga qaadaa gawaarida xamuulka ah ee badeecadaha kasoo qaada Dekedda Muqdisho. |
| 8 | Boorarka | Khidmadaha laga qaado dadka wax ku xayeysiinta boorarka Maamulka Gobolka Benaadir ee wadooyinka Muqdisho. |
| 9 | Canshuurta Qaad-ka | Waxaa laga qaadaa ganacsatada Qaad-ka |
| 10 | Canshuuraha Kastamka Dekedda | Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu helaa 15% dakhliga kasoo xarooda dekedda, taasoo ay maamusho ayna uruuriso shirkad Turki ah oo la yiraahdo Al Bayrak iyadoo loosoo marsiiyo dowladda federaalka. |
| 11 | Canshuurta waddo marista | Waxaa laga qaadaa Bajaajta iyo gaadiidka dadweynaha. |
| 12 | Khidmadda diiwaangelinta madaniga ah | Waxaa lagasoo xareeyaa adeegyada sida bixinta shahaadooyinka dhalashada. |
| 13 | Khidmada waxbarashada | Waxaa laga qaadaa adeegyada uu bixiyo Agaasinka Waxbarashada ee Maamulka Gobolka Benaadir, oo ay ka mid tahay bixinta shahaadooyinka dugsiga hoose/dhexe. |

*Isha: Qoraaga ayaa uruuriyay kadib wareysiyo lala yeeshay dad xog-ogaal ah*

Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu leeyahay waaxyo kala duwan oo mas'uul ka ah kasoo uruurinta dakhliga ee adeeg ay bixiyaan ama canshuur ay si toos ah u qaadaan. Waaxyadan waxaa ka mid ah:

1. **Waaxda Gaadiidka iyo Ganaaxyada** – Waxay canshuur ka qaaddaa Bajaajta, gaadiidka xamuulka, iyo gaadiidka gobollada u safra; waxayna ka shaqeysaa kastamyada lacagaha lagu qaado.

2. **Waaxda Adeegyada Maareynta Dhulka** – Waxay qaaddaa canshuuraha wareejinta dhulka, caddeynta bedelidda milkiyad, diiwaangelin cusub, xallinta khilaafaadka, iyo rukhsadaha dhismaha.

3. **Waaxda Canshuuraha Hantida Ma-guurtada ah** – Waxay canshuur ka qaaddaa dhammaan noocyada hantida, sidoo kale waxay masuul ka tahay boorarka xayeysiinta iyo canshuurta qaadka.

4. **Waaxda Adeegyada Dabaqyada kala Qeyb-qeybsan (Apartments)** – Waxay bixisaa rukhsadaha dhismayaasha dabaqyada kala-qeybsan.

5. **Waaxda Adeegyada Suuqyada** – Waxay canshuur ka uruurisaa waratada; waa waaxda kaliya ee canshuurta ku qaada lacagta Shilin Soomaaliga ah.

6. **Waaxda Biyo-mareennada iyo Bullaacadaha** – Waxay rukhsado siisaa shirkadaha qoda ama hagaajiya waddooyinka si loo geliyo tuubooyinka biyaha, fiilooyinka korontada, ama qaadista qashinka.

7. **Waaxda Diiwaangelinta Madaniga** – Waxay qaaddaa khidmadaha adeegyada sida bixinta shahaadooyinka dhalashada.

8. **Waaxda Adeegyada Caafimaadka** – Waxay khidmad ka qaaddaa baaritaanka caafimaadka ee loo sameeyo shaqaalaha maqaayadaha, timo-jarayaasha, shaqaalaha gowraca xoolaha, iyo darawallada; sidoo kale waxay bixisaa shahaadooyin caafimaad.

9. **Agaasinka Waxbarashada** – Waxa uu khidmad ka qaadaa adeegyada la siiyo dugsiyada iyo ardayda ku sugan gobolka Benaadir.

Dhamaan dakhliyada Maamulka Gobolka Benaadir waxaa si toos ah u uruuriya waaxyahan, marka laga reebo labo—canshuurta hantida maguurtada ah iyo adeegyada maareynta dhulka—oo ay qandaraas ku qaateen labo shirkadood oo gaar loo leeyahay.[3] Dad xog-ogaal ah oo aan ka wareysannay Maamulka Gobolka Benaadir ayaa sheegay in qaadashada qandaraasyadaan aysan soo marin habraac daahfuran.[4]

Xog-ogaallada ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa xusay in waaxaha qaar—adeegyada dhulka, hantida maguurtada, gaadiidka iyo ganaaxyadu—ay yihiin ilaha dakhli ee aasaaska u ah Maamulka Gobolka Benaadir.[5] Mid kamid ah dadka aan wareysannay ayaa ku qiyaasay in waaxda gaadiidka iyo ganaaxa ay uruuriso USD 600,000–750,000 bishii,[6] taasoo badankeed ka timaadda canshuurta waddo-marista, gaar ahaan bajaajta, oo laga qaado $15 bil walba.[7] Waaxda Adeegyada Maareynta Dhulka ayaa lagu qiyaasay in ay soo xareyso ku dhawaad $300,000 bishii.[8]

Waaxyaha kale ee dakhliga soo xareeya ee muhiimka ah waxaa ka mid ah Waaxda Adeegyada iyo Diiwaangelinta Madaniga. Waaxda Diiwaangelinta Madaniga, oo bixisa adeegyada ay kamid yihiin shahaadooyinka dhalashada ayaa la sheegay in ay soo saarto USD 240,000–250,000 bishii. Waaxda adeegyada, oo mus'uul ka ah diiwaangelinta ganacsiyada iyo bixinta ruqsadaha, ayaa la sheegay inay soo xareysay dakhli gaaraya $3 malyan sanadkii 2024—

3 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan mid kamid ah waaxaha dakhli uruurinta, Muqdisho, 16 Febraayo 2025.

4 Wareysi lala yeeshay sarkaal sare oo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir, Muqdisho, 19 Janaayo 2025.

5 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan waaxaha dakhli ururinta, Muqdisho, 16 Febraayo 2025.

6 Ibid.

7 Ibid.

8 Ibid,

taasoo ah koror ka badan sanadkii ka horeeyay. Dadkii la wareystay ayaa kororka dakhliga ku sababeeyay dadaal dheeri ah oo looga hortagay ruqsadaha been-abuurka ah, oo la sheegay in ay fududeyn jireen madaxda heer degmo. Isagoo ka hadlaya sida ay ula tacaaleen xaalladan, wuxuu yiri:

> *"Waxaan bangiyada iyo Dekedda u qeybinnay lambar sir oo xaqiijin ah. Subax kasta, waxaan raadraacnaa tirada ruqsadaha dhacay, waxaana u dirnaa shaqaale, ama waa la wacaa, maadaama aan heyno xogtooda."*[9]

Dadaalladan awgood, waaxdu waxay sheegtay inay diiwaangelisay 90% ganacsiyada magaalada. Ruqsadda ganacsiga wuxuu ku xiran yahay baaxadda ganacsiga wuxuuna u dhexeeyaa $50 ilaa $800.[10] Dhinaca kale, diiwaangelinta ganacsiyada yaryar waxaa laga qaadaa $500, halka shirkadaha dhexdhexaadka ah iyo kuwa waaweyn laga qaado $2,000–$3,000, balse badankood way ka fogaadaan bixinta maadaama ay si qarsoodi ah u shaqeeyaan.[11]

Waaxdan oo kaliya ma aysan sameyn koror dakhli balse waaxyaha kale ayaa sidoo kale sameeyay kobac dakhli, taasoo ay sabab u tahay howl-wadeenada dakhli uruurinta oo la geeyay degmooyinka.

Iyadoo ay jiraan ilo dhaqaale oo haatan shaqaynaya, waxaa la sheegay in Maamulka Gobolka Benaadir uu uruuriyay $47 milyan sanadkii 2023, iyo $58.5 milyan sanadkii 2024, oo aanay ku jirin deeqaha la siiyo.[12] Maamulka ayaa saadaalinaya in uu labo-laabi doono dakhliga sanadka 2025.[13]

---

9 Wareysi lala yeeshay masuuliyiin ka tirsan waaxyaha dakhli uruurinta, Muqdisho, 16 Febraayo 2025.

10 Ibid.

11 Ibid.

12 Wareysi lala yeeshay khabiir arrimaha maaliyadda oo xog-ogaal u ah dakhli uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir, Muqdisho.

13 Ibid.

# Kharashaadka Maamulka Gobolka Benaadir

Waxaa muhiim ah in la iftiimiyo meesha uu Maamulka Gobolka Benaadir ku bixiyo dakhliga uu ka uruuriso gobolka. Si lamid ah sida aanay u jirin daahfurnaan dhanka dakhli uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir ah ayaanay sidoo kale u caddeyn sida lacagta loo isticmaalo iyo meelaha ay ku baxdo. Masuul ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir oo lagu wareystay daraasaddan ayaa sheegay in Maamulka Gobolka Benaadir uu dakhliga ku bixiyo labo meelood oo waaweyn: kharashaadka maamul iyo kharashaadka mashaariicda horumarineed.[14]

Sida lagasoo xigtay ilo xog ogaal ah, 85% miisaaniyadda sanadlaha ah ee Maamulka Gobolka Benaadir waxa lagu bixiyaa kharashaadka maamul. Arrintan waxaa si gaar ah u sababaya tirada badan ee shaqaalaha Maamulka Gobolka Benaadir —kuwaasoo lagu qiyaasay inay u dhexeeyaan 3,000 ilaa 3,400 oo shaqaale ah—oo qaata $1.3 milyan bishii (taasoo gaareysa $15.6 milyan sanadkii), iyadoo miisaaniyadda Maamulka Gobolka Benaadir ee 2024 lagu qiyaasay $68 milyan.[15] Tirada shaqaalaha Maamulka Gobolka Benaadir ayaa la sheegay in ay sii kordheyso, iyadoo shaqaale cusub lagu darayo liiska mushaarka maamulka iyadoo aan la sheegin waajibaadkooda ama baahida loo qabo.[16]

Dhinaca kale, 15% miisaaniyadda sanadlaha ah waxaa loo qoondeeyaa kharashaad horumarineed, oo ay ka mid yihiin dhisidda kaabeyaasha dhaqaalaha iyo adeegyada dadweynaha sida waxbarashada iyo caafimaadka. Waxaa la sheegay in Maamulka Gobolka Benaadir uu ka qeyb qaato dhismaha wadooyinka isagoo adeegsanaya miisaaniyadda horumarineed, lana kaashanaya Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed iyo bulshada degmada si gaar ah uga faa'iideysa dhismaha wadada.

Il kale ayaa sheegaysa in Maamulka Gobolka Benaadir uu leeyahay miisaaniyad loo qoondeeyey dayactirka wadooyinka, inkastoo aysan jirin caddayn muuqata oo muujinaysa wadooyin la dayactiray. Badankood wadooyinkii la dhisay tobankii sano ee la soo dhaafay intooda badan waxay yeesheen godad—qaarkoodna roob ayaa qaaday—taasoo ay ugu wacan tahay tayo xumo dhisme iyo kormeer la'aanta shirkadaha biyaha iyo korontada oo wadooyinka qoda si ay tubbooyin iyo fiilooyin u mariyaan, kana taga iyagoo aanan si wanaagsan dib ugu sameyn.

Adeegyada caafimaadka—gaar ahaan kuwa hooyada iyo dhallaanka—waxaa lagu joogteeyaa taageero laga helo hay'adaha caalamiga ah ee aan dowliga ahayn, halka isbitaallada ay maamusho dowladda federaalka laguna maalgeliyo miisaaniyadda dowladda federaalka. Sidoo kale, dowladda federaalka waxa ay bixisaa kab miisaaniyadeed ee lacagaha lagu maamulo 25 iskuul dowladeed oo ku yaalla Muqdishu.

14 Wareysi lala yeeshay sarkaal sare oo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir, Muqdisho, Janaayo 19, 2025.

15 Ibid.

16 Ibid.

Dadkii ka qeybgalay daraasadda markii la weydiiyey inay aaminsan yihiin in Maamulka Gobolka Benaadir uu bixiyo adeegyo dadweyne oo la taaban karo oo ay muwaadiniinta ugu beddeleen canshuuraha laga qaado, intooda badan waxay ku jawaabeen maya. Qaar kamid ah dadkaas ayaa si khaldan u aaminsanaa in Maamulka Gobolka Benaadir uu bixiyo mushaarka macallimiinta iyo kharashaadka lagu maamulo iskuullada dowladda ee ku yaalla Benaadir, iyadoo iskuulladaas lagu maalgeliyo miisaaniyadda dowladda federaalka. In yar ayaa sidoo kale aaminsanayd in Maamulka Gobolka Benaadir uu bixiyo kharashaadka ciidanka amniga.

Inkastoo Maamulka Gobolka Benaadir uu canshuur ka uruuriyo gobolka, ma jiraan adeegyo dadweyne oo muuqda oo lagu beddelay canshuurtaas. Waxaa la yaab ah, dadka deegaanka ayaa si gaar ah u bixiya xitaa adeegyada aasaasiga ah ee laga filan karo maamulka, sida uruurinta qashinka. Halkii ay ahayd in Maamulka Gobolka Benaadir uu adeeggaas ku bixiyo canshuurta uu qaado, waxa uu heshiis la galay shirkad maxalli ah oo la yiraahdo *Waste Management*, taasoo qoyskiiba ka qaadda lacag bille ah oo u dhexeysa USD 5–10, taasoo ku xiran qashinka la qaado iyo inta jeer ee la qaado.

Arrintan waxay keeneysaa in dadka deegaanka ay is weydiiyaan su'aal ah: maxay u bixinayaan canshuur haddii aysan xitaa heli karin adeegyada ugu fudud ee laga filayo Maamulka Gobolka Benaadir?

# Qaab-dhismeedyada Sharci ee Dakhli Uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir

Qaab-dhismeedyada sharci waa shuruudaha aasaaska u ah ku lug-lahaanshaha hay'adaha dowladda ee dakhli uruurinta, maadaama shuruucdaas ay siinayaan awoodda iyo sharci ahaanshaha lagama maarmaanka u ah dakhli uruurinta; waxayna qeexaan noocyada dakhliga la uruurinayo iyo hay'adda uruurinaysa; iyo sidoo kale saamiga la uruurinayo. Sidoo kale, qaab-dhismeedka sharci wuxuu ku dhiirrigeliyaa in canshuur bixiyeyaasha siiyaan canshuurta hay'adda saxda ah, taasoo keeneysa in ay ka dalbadaan dowladda isla xisaabtan ku saabsan halka ay ku baxayso canshuurahooda. Haddii sharci qeexa canshuurta aanu jirin, waxaa soo baxaya su'aalo culus oo ku saabsan sharciyadda dakhli uruurinta, taasoo keeni karta in dadka arrinkaa ka welwelsan ay lacagahooda sii haystaan ayna habraaca la xiriiriyaan qaabab kale oo sharci darro ah oo lacag lagu helaayo.

Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu gobolka Benaadir ka uruuriyaa noocyo kala duwan oo dakhli ah inkastoo uusan jirin gole sharci-dejin oo dejiya sharciyada aasaasiga u ah uruurinta canshuuraha kala nooca iyo tirada ah. Xog-ogaallo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa sheegay in Maamulka Gobolka Benaadir aanu lahayn sharci la xiriira dakhli uruurin. Tani waxaa ugu wacan in baarlamaanka federaalka uusan meel-marin sharciyo lagu maamulo dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir, maadaama uu gobolka hoos tago dowladda federaalka. Xog-ogaalladan ayaa sidoo kale ku dooday in Maamulka Gobolka Benaadir uusan dakhliga uu uruuriyo ku saleynin sharciyadii xilligii taliskii militariga.

Marka lagasoo tago jiritaan la'aanta sharci haga canshuur uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir, xubno ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa sheegaya in gobolka uu ku tiirsan yahay awaamiirta uu bixiyo duqa magaalada ee xilka haya. Maayarrada iyaga ayaa soo saara noocyo cusub oo dakhli canshuur uruurin ah iyagoo kaashanaya guddi loo magacaabo in ay qiimeeyaan suuraagalnimada uruurinta noocyo dakhli gaar ah iyo go'aaminta heerarka ku habboon.

Inkastoo aysan jirin qaab-dhismeedyo sharci, intooda badan dadka la wareystay waxay muujiyeen inaysan wax aqoon ah u lahayn jiritaanka qaab-dhismeed sharci oo la xiriira dakhli uruurinta canshuuraha ee Maamulka Gobolka Benaadir iyo sharcinimadooda. Qaar kale waxay si qaldan u aaminsanaayeen in Maamulka Gobolka Benaadir uu xaq u leeyahay in uu canshuur uruuriyo maadaama uu maamul jiro. Tani waxay muujinaysaa sida dadka deegaanku ay badankood uga war-hayn in canshuur uruurinta ay u baahan tahay sharci qeexaya iyo in maamulku uusan xaq u haysan in uu dakhli uruuriyo iyadoo aysan jirin qaab-dhismeed sharci oo u oggolaanaya awoodahaas.

Qaar kamid ah ka qaybgalayaasha daraasadda ee shakiga ka muujiyay sharcinimada canshuur uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir waxay arrintan la xiriiriyeen isticmaalka awoodda, sida aan sharciyeysneyn ee saamiga canshuuraha u dejiyaan uruuriyeyaasha, iyo hufnaan la'aanta dukumentiyada lagu sheegay sababta canshuurta loo qaadayo.

Mid kamid ah ka qaybgalayaasha, oo ahaa dhallinyaro ka qaybgalay wareysi-kooxeed lagu qabtay degmada Howlwadaag, ayaa yiri:

> *"Sharciga lagu qaadayo canshuuraha waa mid aan caddayn, annaga oo muwaadiniin ah waligeen ma arag. Canshuuraha si kala duwan ayaa loo qaadaa, ma jiraan amar cad oo gobolka Benaadir ka yimid oo na ogeysiinaya sharciga canshuuraha ama oggolaansho baarlamaan."*[17]

Ka qaybgale kale oo dhallinyaro ah ayaa si lamid ah muujiyay walaac la xiriira sharcinimada canshuuraha uu uruuriyo Maamulka Gobolka Benaadir. Ka qeybgalahan waxa uu su'aal geliyay sharcinimada canshuuraha, wada xaajoodyada lala yeelan karo canshuur uruuriyeyaasha, masuuliyadda canshuur uruuriyeyaasha oo dhexdooda kala duwan. Iyagoo arrinkan ka hadleysa ayay tiri:

> *"Canshuurahan ma aha sharci sababtoo ah ma aha kuwo go'an, waa laga xaajoon karaa ama xitaa waxaa la sameyn karaa qiimo dhimis wadaxaajood ku yimid. Intaa waxaa dheer, markaad lacagta siiso canshuur qaadayaasha,waxaa lacag taa la mid ah ku weydiin kara canshuur uruuriye kale adigoo horey u bixiyay."*[18]

Jiritaan la'aanta sharci qeexaya noocyada iyo heerarka dakhli ee uu Maamulka Gobolka Benaadir uruuriyo ayaa waxa ay canshuur bixiyeyaasha fursad u siinaysaa inay cabasho ka keenaan dakhli uruurinta hadda la sameeyo—haddii uusan Maamulka Gobolka Benaadir soo bandhigin sharci dadku wada heli karaan oo qeexaya noocyada canshuuraha, heerarkooda, qaababka bixinta iyo cidda mas'uulka ka ah. Xaaladdan waxa ay Maamulka Gobolka Benaadir ku sababi kartaa in uu si dhab ah u tixgeliyo xaaladda uuna sharciyad ka raadsado hay'adda ku shaqada leh—baarlamaanka federaalka—kaasoo u oggolaanaya canshuuro uu sisharci ah u uruurin karo.

Habka canshuur uruurin ee jira oo ku saleysan awaamiirta kasoo baxda duqa magaalada ama guddoomiyaha gobolka, ma aha mid ku filan rasmiyeynta habraaca. Waxaa loo baahan yahay qaab-dhismeed sharci oo la jaan qaadaya duruufaha iyo xaaladda gobolka Benaadir, islamarkaana sharciyad ka helaya dadka deegaanka. Tan dambe waxaa lagu gaari karaa in daahfurnaan laga muujiyo dakhliga la uruuriyo iyo isla-xisaabtan ay la yeelan karaan dadka bulshada oo la xiriira sida lacagahooda canshuurta uu maamulka u isticmaalo—taasoo muwaadiniinta u oggolaaneysa inay qiimeeyaan haddii canshuurta ay bixiyaan si sax ah loo isticmaalo.

---

17 Qof kamid ah qaybqaatayaasha dhalinyaro wareysi-kooxeed loogu qabtay degmada Howlwadaag, Muqdisho, 12 Janaayo 2025

18 Gabar da'yar oo ka qaybqaadatay wareysi-kooxeed loo qabtay dhallinyaro ee lagu qabtay degmada Hodon, Muqdisho, 01 December 2024

# Wacyiga Dadweynaha ee Canshuuraha Maamulka Gobolka Benaadir

Heerka wacyiga canshuur-bixiyeyaasha ee canshuuraha la uruuriyo waxaa lala xiriirin karaa xiriirka u dhexeeya muwaadiniinta iyo Maamulka Gobolka Benaadir, iyo heerka xogta dakhliga canshuuraha ee lala wadaago bulshada. Waxaan weydiinnay dhammaan ka qaybgalayaasha xog uruurinta, wareysi-kooxeedyada iyo wareysiyada lala yeeshay dadka xog-ogaalka ah, heerka aqoonta ay u leeyihiin canshuuraha uu Maamulka Gobolka Benaadir qaado, heerarka canshuurahaas, iyo sharciyada lagu saleeyo.

Nasiib darro, dadka daraasadan lagu wareystay oo ka kala socday qeybo kala duwan oo bulshada ka tirsan—marka laga reebo shaqsiyaad yar oo xog-ogaal ah oo ka socday Maamulka Gobolka Benaadir iyo khubaro arrimaha maaliyadda—waxay muujiyeen wacyi iyo aqoon la'aan la xiriirta noocayada dakhliga canshuuraha ee uu Maamulka Gobolka Benaadir ka qaado dadka deegaanka. Sikastaba ha ahaatee, waxa ay xuseen canshuuraha hantida maguurtada ah iyo canshuuraha dakhliga kirada, inkastoo ay u muuqdeen kuwa ku wareersan hay'adda qaadda canshuuraha —Wasaaradda Maaliyadda ee dowladda federaalka mise Maamulka Gobolka Benaadir. Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu qaadaa canshuurta hantida maguurtada ah, halka Wasaaradda Maaliyadda ay qaaddo canshuurta dakhliga kirada.

Intaa waxaa dheer, dadka la wareystay badankooda waxa ay muujiyeen in aysan wax xog ah ka heysan saamiga saxda ah ee canshuuraha. Qaar ayaa sheegay in saamiga canshuurta aan la hubin lana saadaalin karin iyo in ay iska bixiyaan lacagta ay canshuur uruuriyeyaashu u sheegaan in laga doonayo, iyadoo canshuur-bixiyeyaashu aanay heli karin wax xog ah oo ay ku diidi karaan sheegashadaas. Tani waxaa qeyb ahaan loo tiirin karaa xaddidnaanta ama jiritaan la'aanta xiriir ay la leeyihiin Maamulka Gobolka Benaadir ee arrimaha la xiriira dakhliyada canshuuraha iyo saamiga iyo canshuur-bixiyaha laga doonayo. Xallinta arrinkan waxa uu ka hortagi karaa isku-dayada canshuur-uruuriyeyaasha ay ku musuqi karaan nidaamka canshuur uruurinta waxayna meesha ka saari lahayd shakiga ay canshuur-bixiyeyaashu ka qabi lahaayeen in la qiyaameeyay.

Maqnaashaha macluumad la xiriira canshuurta waxaa ka faa'iideysan kara canshuur-uruuriyeyaasha oo lacag dheeri ah ka qaadi kara canshuur-bixiyeyaasha aan xog-ogaalka ahayn waxayna ka qaadi karaan lacag ka badan qiimihii laga rabay ama/iyo inay ku bixiyaan xiisaabaad shaqsiyadeed ama telefoon uu qof shaqsi ah leeyahay. Sidaas awgeed, tani waxay sii dhaawici kartaa xiriirka aaminaad ee liita ee u dhexeeyay dadka iyo canshuur uruuriyeyaasha. Intaa waxaa dheer, wacyi la'aanta ballaaran ee ka jirta bulshada waxay u muuqataa in ay Maamulka Gobolka Benaadir siineyso gabaad ay ka galaan dhaleeceynta dadweynaha iyo isla-xisaabtan ku aadan canshuurta la uruuriyo. Sidoo kale waxay niyad-jabineysaa kaqaybgalka bulshada ee isbeddellada muhiimka ah ee lagu sameyn lahaa nidaamka dakhli uruurinta iyo sida dakhligaasi loogu isticmaali lahaa adeegyada dadweynaha oo ay bulshada aadka ugu baahan tahay.

# Qaababka Isgaarsiin ee Canshuurta Maamulka Gobolka Benaadir

Sida looga soo hadlay qeybta kore, ka qaybgalayaasha daraasadda waxay muujiyeen xogta yar ee ay ka heystaan noocyada kala duwan ee dakhliga canshuurta uu qaado Maamulka Gobolka Benaadir iyo gaar ahaan nooca canshuuraha ay iyagu bixiyaan. Tani waxay la xiriirtaa sida Maamulka Gobolka Benaadir uu macluumaadka canshuuraha ee saxda ah ugu gudbiyo bulshada, sida saamiga canshuuraha kala duwan iyo hababka bixinta.

Iyadoo laga duulayo maqnaashaha muuqda ee macluumaadka, waxaan weydiinay ka qaybgalayaasha, wareysi-kooxeedyada iyo wareysi xog-ogaaleedyada labadaba, sida ay ku helaan macluumaad ku saabsan canshuuraha laga rabo inay bixiyaan. Jawaabaha ay bixiyeen ka qeybgaleyaasha ayaa muujiyay inaysan jirin marin isgaarsineed nidaamsan oo mideysan oo bulshada deegaanka lagula wadaago macluumaad la xiriira canshuuraha oo la isku haleyn karo. Iyadoo aysan jirin habab isgaarsiineed, waxaa sidoo kale kala duwan marinnada hababka xogta lagula wadaago hal koox oo canshuur-bixiyeyaal ah.

Milkiilayaal dhowr ah oo leh hanti maguurto ah ayaa sheegay habab kala duwan oo ay ku helaan macluumaadka. Qaar kamid ah kooxahan ayaa tilmaamay inay helaan farriimo gaagaaban oo ku wargelinaya inay bixiyaan canshuurta. Sikastaba ha ahaatee, dhammaan dadka hantida maguurtada ah leh ma helaan farriimahaas; taas baddelkeeda, saraakiisha canshuurta uruurisa ayaa si shaqsi ah u taga xaafadaha iyagoo wata ogeysiisyo ku saabsan bixinta canshuuraha marka la gaaro bilowga sanadka. Qaar ayaa sheegay in la ogeysiiyo in muddo saddex maalmood ah la siinayo si canshuurta ugu bixiyaan.

Dhinaca kale, qaar ayaa sheegay in iyadoo aysan jirin ogeysiis hore oo ah in canshuur laga doonayo, ay ciidan hubeysan yimaadaan guryahooda mararka qaarna ay xiraan qof kamid ah dadka guriga deggan una kaxeystaan degmada ilaa inta canshuurta laga dhiibayo. Iyadoo arrintan sharraxeysa, kaqeybgale dumar ah ayaa tiri:

> *"Booliiska ayaa iridda kuu soo istaagaya oo xoog ku soo gelaya haddii aad si degdeg ah uga jawaabin. Haddii aadan isla markiiba lacagtaas bixin, waxay xoog kuugu kaxeynayaan saldhigga booliska."*[19]

Kala duwanaanshaha hababka loo mariyo gaarsiinta milkiilayaasha hantida maguurtada ah macluumaadka canshuuraha waxaa raad ku leh maqnaashaha xog dhameystiran oo leh faahfaahin la xiriirta hantida maguurada ah ee Benaadir (sida lambar hantiyeedka, magaca milkiilaha, degmada, xaafadda, nooca hantida, iyo lambarka taleefan ee milkiilaha hantida) iyo astaamaha go'aamiya saamiga canshuurta. Qaar kamid ah dhulalka magaalada waxay leeyihiin lambarro diiwaangelin oo ay ku buufisay waaxda dhulka ee Maamulka Gobolka Benaadir, balse sida muuqata looma isticmaalin gudbinta macluumaadka canshuurta ku waajibtay oo ay tahay in ay bixiyaan.

19 Ka-qaybgale dheddig oo ka mid ah haweenka wareysi-kooxeed loogu qabtay degmada Hodon, Muqdisho, 02 December 2024.

Sidoo kale, waaya-aragnimada ganacsatada ayaa ahayd mid u eg tan milkiileyaasha dhulalka. Dhankooda, ganacsatada oo laga doonayay inay bixiyaan ruqsad ganacsi oo sanadle ah ayaa sheegay inay macluumaadka canshuur-bixinta ku heli jireen fariimo gaagaaban oo ka imaanayay xafiiska Maamulka Gobolka Benaadir ee masuulka ka ah bixinta ruqsadaha iyo uruurinta lacagta ruqsadaha ganacsi ee sanadlaha ah. Sikastaba ha ahaatee, ganacsato kale ayaa hoosta-ka-xariiqay in saraakiisha canshuurta ay si shaqsi ah ugu yimaadaan ganacsiyadooda iyagoo wata fariimo wargelin oo ah cusbooneysiinta ruqsadda ganacsi.

Haweeney ganacsato ah oo leh dukaan lebiska dumarka lagu iibiyo ayaa si cad u qeexday qaab u muuqday niyad-jab, sida ay ku hesho macluumaadka cusbooneysiinta ruqsaddeeda ganacsi: *"waxaan arkaa un boolis albaabkeyga taagan oo lacag raadinaya!"*[20]

Dhanka kale, sarkaal sare oo ka tirsan waaxda adeegga ee Maamulka Gobolka Benaadir oo masuul ka ah bixinta ruqsadaha ganacsi iyo diiwaangelinta shirkadaha ayaa sheegay in waaxdu ay joogtayso diiwaangelinta dhammaan ganacsiyada ku yaalla Benaadir, waxayna daba-joogtaa ruqsadaha waqtigooda dhamaaday, waxayna ogeysiisyo waaxda u dirtaa ganacsiyadaas si ay waqtigeeda ugu cusbooneysiiyaan ruqsadahooda.[21] Masuulkan ayaa sheegay in ay ganacsiyada fariimahooda kasoo jawaabi waaya u diraan booliska ku shaqada leh canshuurta.[22] Sikastaba ha ahaatee, ganacsato lagu wareystay daraasadan ayaa ka cawday in ganacsiyadooda la xiray iyagoo macaamiil u adeegaya.

Taas cagsigeeda, milkiileyaasha bajaajta ayaa ah kooxda kaliya ee canshuur-bixiyeyaal ah oo heli kara application taleefan. Waxa ay bixiyaan $15 oo bille ah oo canshuur wado-maris ah waxayna helaan ogeysiis. Si lamid ah, booliska deegaanka ee ku shaqada leh kormeeridda u hogaansanaanta darawalada bajaajta ee canshuurta ayaa adeegsada teknoolojiyadan. Waxa ay si fudud ku ogaan karaan haddii bajaajta wadada mareysa ay bixisay canshuurta iyagoo ka eegaya macluumaadka sida tirsiga taargada.

Inkastoo ay jiraan kala duwanaansho iyo baahiyo muuqda oo ay xuseen inta badan dadka la wareystay, guddoomiye hore oo degmo oo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa sheegay in Maamulka Gobolka uu leeyahay habab uu dadka ku gaarsiiso macluumaadka la xiriira dakhliga canshuuraha. Wuxuu xusay in hababkaasi ka mid yihiin: Idaacada Maamulka Gobolka Benaadir oo baahisa ogeysiisyada canshuuraha; mas'uuliyiinta degmooyinka oo lagu wargeliyo in ay bulshada deegaanka la wadaagaan macluumaadka ku saabsan noocyada canshuuraha, saamiga, iyo baahida loo qabo in dadweynaha lagu wacyigeliyo waajibaadkooda canshuureed; iyo ololeyaal wacyigelin oo guri-guri loo fuliyo iyadoo ay iska kaashanayaan masuuliyiinta degmooyinka iyo hoggaanka bulshada si kor loogu qaado wacyiga arrimaha canshuur-bixinta.[23]

20 Wareysi lala yeeshay haweeney ganacsato ah, Muqdisho, 19 Diseembar 2024.

21 Wareysi lala yeeshay sarkaal ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir, Muqdisho, 16 Febraayo 2025.

22 Ibid.

23 Wareysi lala yeeshay guddoomiye hore ee degmo, Muqdisho, 12 Janaayo 2025.

Jiritaan la'aanta hal il oo lagu kalsoonaan karo oo farriimaha canshuurta loogu gudbiyo canshuur-bixiyeyaasha oo ku saabsan canshuurta taagan iyo saamiga ayaa waxa ay canshuur-uruuriyeyaasha siineysaa fursad ay xogta ugu isticmaalaan danahooda, maadaama canshuur-bixiyeyaasha aysan gaari karin xogta saxda ah si ay uga horyimaadaan waxa ay u sheegaan canshuur-uruuriyeyaasha. Tani waxa ay sii cakireysaa is-aamin darrada ka jirtay dowladda hoose iyo dadka deegaanka waxa ayna xoojin kartaa shakiga ay qabeen dadka deegaanka oo ahaa in canshuurta ay bixiyaan aysan gelin khasnadda saxda ah balse ay taas bedelkeeda jeebka u gasho canshuur-uruuriyeyaasha iyo dadka la shaqeeya.

# Hab-dhaqanka Canshuur-Uruuriyeyaasha iyo Fal-celinta Bulshada

Waaxaha kala duwan ee Maamulka Gobolka Benaadir ee uruuriya dakhliga canshuuraha waxay leeyihiin saraakiil canshuur uruurin oo ay la socdaan rag wata dareyska ciidanka booliska islamarkaana ku hubeysan AK-47. Waxaa loo kala qeybiyay degmooyin iyo xaafado kala duwan si ay u uruuriyaan canshuur. Dhaqan(xumada) canshuur-uruuriyeyaashan ayaa waxay dadka deegaanka ku noqotay arrin walaac leh. Sidaas darteed, doodda ku saabsan sida ay canshuur-qaadayaasha ula macaamilaan dadka deegaanka waxaa aad u daneynayay a hadalkeeda ka qaybgalayaasha daraasadda, kuwaasoo si xamaasad leh uga qeyb qaatay wadahadalka, iyagoo u arkayay fursad ay ku muujin karaan dareenno horay u duugoobay iyo waayo-aragnimo ay la kulmaan—mararka qaar si maalinle ah—iyagoo la macaamilaya canshuur-uruuriyeyaasha.

Ka qeybgalayaashu, iyagoo ka kala yimid kooxaha canshuurta bixiya ee kala duwan, waxay si mideysan u muujiyeen caro xad-dhaaf ah oo ay u qabaan hab-dhaqanka canshuur-uruuriyeyaasha, iyagoo ku sifeeyay "mid xun," "aad u qalafsan," "aan la aqbali karin," "bini'aadamnimada ka baxsan," sidoo kalena "aan ixtiraam lahayn," iyo ereyo kale oo muujinaya sida xun ee loola dhaqmo dadka.

Intaa waxaa dheer, ka qeybgalayaashu waxay canshuur-uruuriyeyaasha iyo askarta la socota ku sifeeyeen inay yihiin kuwo aan tababarnayn, anshax xun, sidoo kalena lahayn akhlaaq shaqo oo wannaagsan, taasoo ka dhigaysa kuwo aan shaqada u qalmin. Waxay Maamulka Gobolka Benaadir ku cambaareeyeen inay masuuliyaddaas ku aamineen shaqsiyaad aan lahayn sifooyin muhiim ah sida naxariis, garasho wanaagsan, iyo damqasho.

Sheekooyinka ka qaybgalayaasha waxay ahaayeen kuwo aad isugu eg. Dadka deggan guryaha waxay sheegeen in canshuur-uruuriyeyaashu ula dhaqmaan si adag. Waxay sharraxeen in canshuur-uruuriyeyaashu xaafadaha yimaadaan oo si xooggan oo is-xigxiga u garaacaan albaabada—mararka qaar iyagoo isticmaalaya hubkooda—ilaa qof albaabka furo. Marka la furo, waxay dadka deggan weydiiyaan haddii ay bixiyeen canshuurta sanadlaha ah ee dhulka. Haddii jawaabtu maya noqoto, waxay dalbadaan in mid kamid ah dadka guriga jooga uu u raaco xafiiska degmada ay ka tirsan yihiin. Ka qeybgalayaashu waxay sheegeen in haddii dalabkaas la diido, ay si khasab ah qof u wataan.

Waxaa la sheegay in canshuur-uruuriyeyaashu ay dadkaas isku soo uruuriyaan kadibna ay ku ridaan gaadiid u gaar ah oo loogu talagalay in lagu uruuriyo dadka aan canshuurta dhulka bixin. Kadibna waxaa loo qaadaa xafiisyada degmooyinka, halkaas oo mararka qaar lagu hayo meelo bannaan ah iyadoo aan wax gabbaad ah ka haysan qorraxda kulul iyagoo lagu haayo xarunta ilaa canshuurta laga bixiyo.

Dadka deegaanka waxay muujiyeen sida ay uga xun yihiin hab-dhaqanka canshuur-uruuriyeyaasha, iyagoo xusay dhacdooyin badan oo si xun loola dhaqmay. Waxay ka cabanayeen in canshuur-qaadayaashu yimaadaan iyagoo aan wax ogeysiis ah horay u bixin, xitaa mararka qaar ka hor inta uusan waqtigii loo qabtay dhammaan. Waxay sheegeen in canshuur-

qaadayaashu aysan waxba ka galin in digniin la bixiyay iyo in kale, balse ujeeddadoodu tahay oo keliya in la helo lacag ama qof.

Ka qeybgalayaashu waxay kaloo sheegeen in mararka qaar canshuur-uruuriyeyaashu ay la baxaan albaabada guriga si ay dadka ugu qasbaan inay lacagta bixiyaan. Mararka kale, waxaa la sheegay in canshuur-uruuriyeyaashu ay albaabada ku xiraan fure haddii caruurta guriga ku sugan ay u sheegaan in waalidkood aysan joogin. Dadka deriska ah ayaa la sheegay inay xaaladahaas oo kale caawiyaan dadka la dhibaataynayo.

Intaa waxaa dheer, dadka la wareystay ayaa muujiyay walaac ah in canshuur-uruuriyeyaashu aysan wax kala sooc ah ku samayn waayeel, haween, caruur iyo rag midna marka ay geynayaan xarunta degmada. Waxaa naxdin leh in dadka la wareystay ay sheegeen dhacdooyin dad waayeel ah iyo haween umul ah oo si khasab ah loo waday lana haystay ilaa canshuurta la bixiyo.

Iyadoo ka falcelineysa dhaqankan aan kala-sooca lahayn, haweeney ka qeybgashay wareysi-kooxeed dumar kaliya loo qabtay oo ka dhacay degmada Yaaqshiid ayaa tiri, *"…xitaa hooyooyinka umusha ah ee aan raggoodu joogin naxariis lama tuso; si khasab ah ayaa loo kaxaystaa."*[24]

Dadka ka qeybgalay daraasadda ayaa sidoo kale carabka ku adkeeyay in canshuur-uruuriyeyaashu aysan ka fikirin in dadka deegaanka ay awoodaan inay bixiyaan canshuurta iyo in kale. Waxay xuseen dhacdooyin ay qoysas sabool ah oo ku tiirsanaa caawimaadda deriska loogu xiray sababo la xiriira canshuurta dhulka oo aan la bixin. Xaaladahaas oo kale, waxaa la sheegay in derisku ay lacag iska uruuriyaan si ay u bixiyaan canshuurta, una soo daayaan dadka la xiray ee xaafadda la deggan.

Masuul hadda ka tirsan degmo oo la wareystay ayaa cadeeyay in canshuur-uruuriyeyaasha iyo masuuliyiinta degmooyinku aysan wax awood ah u lahayn inay canshuurta ka dhaafaan dadka saboolka ah; awooddaas waxaa iska leh duqa magaalada, kaasoo badanaa aan la heli karin. Sidaas darteed, qoysaska danyarta ah ayaa dhib weyn ku qaba maadaama aysan awoodin inay la xiriiraan masuuliyiinta gobolka si ay cabashadooda ugu gudbiyaan.

Kireysteyaasha ayaa si gaar ah u muujiyay caro ku aaddan in si aan sax ahayn loogu xiro canshuur aanan waajib ku ahayn. Waxay sheegeen in canshuurta hantidu ay tahay masuuliyadda milkiilayaasha guryaha, balse canshuur-uruuriyeyaashu ay xiraan qof kasta oo guriga jooga iyagoo aan hubinin in qofku yahay kirayste ama milkiilaha guriga.

Waayo-aragnimo la mid ah ayaa waxaa sidoo kale ka hadlay ganacsatada, oo ay ku jiraan ganacsatada ganacsiyada yaryar ee suuqyada magaalada. Canshuur-bixiyayaashani waxay sheegeen inay si joogto ah ula kulmaan dhibaatooyin iyo cadaadis ka yimaada canshuur-uruuriyeyaasha. Tusaale ahaan, haddii ruqsadda ganacsigu ay wakhti dhaw dhacday, canshuur-uruuriyeyaashu waxay xiraan ganacsiga waxayna xirtaan milkiilaha.

24 Ka-qaybgale dheddig oo ka mid ah haween wareysi-kooxeed loogu qabtay degmada Yaaqshiid, Muqdisho, 26 Diseembar 2024.

Ganacsade ka howlgala suuqa Xamar Weyne ayaa yiri, *"...inta ay socoto howshan, macaamiisha dukaanka joogta waa la eryaa, dukaankaagana waa la qalqal galiyaa. Tani kaliya ma ahan ceeb, balse sidoo kale waxay dhaawacaysaa habsami u socodka ganacsigaaga."*[25]

Waratada waddooyinka, oo si maalinle u bixiya khidmadaha suuqyada iyagoo Shilin Soomaali siiyana canshuur-uruuriyeyaasha Maamulka Gobolka Benaadir, ayaa iyaguna sheegay in si xun loola dhaqmo. Qaar waxay xuseen in ay jirto isku xirnaan la'aan ka dhex jirta canshuur-uruuriyeyaasha, taasoo sababtay in mid walba markiisa lacag dalbado, taasoo mararka qaar keenta in canshuur qasab ah oo ka badan intii la rabay la qaado. Haweeney kamid ah waratada degmada Yaaqshiid ayaa tiri: "Mararka qaar waxaan bixinnaa canshuur ka badan intii la rabay sababtoo ah saraakiil dhowr ah ayaa canshuurta naga uruurinaya iyadoo aysan jirin wax isku xirnaan dhexdooda ah." [26] Sikastaba ha ahaatee, waxay xustay in waayadan dambe uu hal canshuur-qaade oo kaliya la macaamilo, islamarkaana uusan hanjabaad adeegsan sidii horey loo arki jiray.[27]

Sikastaba ha ahaatee, ka qeybgaleyaal kale oo la wareystay ayaa sheegay in uruuriyeyaasha lacagaha maalinlaha ah ay weli si xun u dhaqmaan. Ganacsade ka shaqeeya suuqa Xamar Weyne ayaa canshuur uruuriyeyaasha ku eedeeyay inay ula dhaqmeen si bini'aadannimada ka baxsan.[28] Wuxuu yiri, "*Alaabtaada waxay u jiidaan sida qashin, wayna burburinayaan, gaar ahaan kuwa iibiya alaabaha yaryar*."[29]

Ka sokow tabashooyinka la xiriira dhaqan-xumada, qaar kamid ah dadka la wareystay ayaa soo jeediyay in dhiirrigelinta maaliyadeed oo ay canshuur uruuriyeyaasha heystaan ay sabab u tahay dhaqamadooda adag. Waxay sheegeen in canshuur uruuriyeyaasha ay gunno ka helaan marka ay lacag uruuriyaan ama tirada dadka ay geeyaan xafiisyada degmada si ay ugu qasbaan canshuur bixinta.

Dhaqan-xumadan cadaalad darrada ah waxa ay xaalado qaar horseedeen cawaaqib-xumo ay kamid tahay geerida naf aan waxba galabsan. 10-kii Janaayo 2023-kii, askari ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa toogtay kuna dilay wiil da'yar oo nacnac ku iibinayay degmada Hamar Weyne, kadib muran ka dhashay canshuur dhan 5,000 Shilin Soomaali ah (qiyaastii 25 senti) (Dalsan Radio, 2023). Askarigii falka geystay si degdeg ah ayaa loo xiray, waxaana 15-kii Janaayo 2023 maxkamad ciidan oo Muqdisho ku taalla ku xukuntay dil toogasho ah. Sikastaba ha ahaatee, wali ma cadda in xukunkaasi la fuliyay (BBC, 2023).

Darawallada Bajaajta ayaa sidoo kale la kulma dhibaatooyin joogto ah iyo rabshado marmar uga yimaada canshuur uruuriyeyaasha iyo booliska taraafikada. Tani waxay dhacdaa gaar ahaan marka darawalladu isku dayaan inay ka cararaan dhaqan-gelinta canshuurta ama lagu

25 Qof ka qayb qaatay wareysi-kooxeed loo qabtay dhalinyarada oo lagu qabtay degmada Xamar Weyne, Muqdisho, 17 Noofambar 2024.

26 Ka-qaybgale dheddig oo ka mid ah haweenka wareysi-kooxeed loogu qabtay degmada Hodan, Muqdisho, 02 Diseembar 2024.

27 Ibid.

28 Wareysi lala yeeshay ganacsade ku sugan degmada Xamar Weyne, Muqdisho, 21 November 2024.

29 Ibid.

tuhmo inay wataan Bajaajta ruqsad la'aan. Mararka qaar, canshuur-uruuriyeyaasha ama booliiska ayaa rasaas ku fura darawallada Bajaajta, taasoo keenta dhimasho.

Hab-dhaqanka aan wanaagsaneyn ee kor lagu xusay ee canshuur-uruuriyeyaasha ma ahan mid ku kooban gobolka Benaadir. Waxa uu ka jiraa magaalooyin waaweyn oo dalka, dadka deegaankuna waa ay ka daaleen hab-dhaqankaas. Tusaale ahaan, wakiillo ka socday ururrada bulshada rayidka ah ee Boosaaso, Puntland, oo ka qeybgalay aqoon-is-weydaarsi aan dhawaan qabannay si sare loogu qaado isla-xisaabtanka maaliyadeed iyo midka dhaqaale ee dowladda hoose ee Boosaaso, ayaa muujiyay walaac la mid ah kan dadka Benaadir ka qabaan hab-dhaqanka foosha xun, ee adag ee aan kala joogsiga lahayn oo ay ku kacaan canshuur uruuriyeyaasha magaalada marka ay ku guda jiraan howlaha canshuur uruurinta.

Sikastaba ha ahaatee, eedda oo dhami dusha lagama saari karo saraakiisha canshuur uruuriyeyaasha ee Maamulka Gobolka Benaadir iyo booliska la socda oo kaliya. Canshuur uruuriyeyaasha dowladda federaalka iyo booliska la shaqeeya waxay iyagana masuul ka yihiin carada dadweynaha, maadaama ay iyaguba qeyb ka yihiin si xun ula dhaqmidda canshuur bixiyeyaasha gobolka Benaadir.

Qaar kamid ah dadka la wareystay waxay ku sababeeyeen hab-dhaqanka rabshadaha wata ee joogtada ah ee uruuriyeyaasha canshuurta in ay ka dhalatay wacyi la'aanta dadka deegaanka ee ku aaddan xuquuqdooda. Ganacsade la wareystay oo xog-ogaal ah ayaa yiri, "Nasiib darro, dad badan waxay si khaldan u rumeysan yihiin in hab-dhaqanka noocan ah uu sax yahay, sababtoo ah waxay u haystaan in ay caadi tahay in dowladda sidaas u dhaqanto."[30] Wuxuu sii raaciyay, "Dadweynuhu ma helin wacyigelin ku saabsan xuquuqdooda siyaasadeed, taasoo ka dhigeysa arrinta mid aan si fudud loo xallin karin."[31]

Inkastoo kooxo kala duwan ay si xoog leh caro uga muujiyeen dhibaatooyinka joogtada ah ee canshuur uruuriyeyaasha, masuul ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir oo si aan rasmi ahayn loogala hadlay hab-dhaqanka canshuur-uruuriyeyaasha iyo walaaca sii kordhaya ee ka imaanaya bulshada deegaanka, ayaa qirtay in canshuur uruuriyeyaasha ay si xun ula dhaqmaan shacabka, islamarkaana aan wax tallaabo dhab ah laga qaadin si loo joojiyo dhaqankaas, kaasoo si weyn u dhaawacaya sumcadda maamulka iyo sida loo arko canshuurta.

Inkastoo Maamulka Gobolka Benaadir uu sida aan horay usoo xusnay la daalaa-dhacayo maqnaashaha qaab-dhismeed sharci oo ay u dejiyeen hay'adaha ku shaqada leh in ay sharciyeeyaan canshuuraha la qaado, haddana dhaqan-xumada ay canshuur uruuriyeyaashu kula kacaan dadka deegaanka ayaa sii wiiqeysa sharciyadda canshuur uruurinta ee indhaha canshuur bixiyeyaasha. Intaa waxaa dheer, hab-dhaqanka aan la xakameyn ee canshuur-uruuriyeyaasha iyo booliska la socda waxa ay dadka ka fogeynayaan dowladda waxa ayna bulshada ku sababeysaa inay rumeystaan inaysan muwaadiniin ahayn iyo in lacagta ay bixiyaan aysan canshuur ahayn balse lagu tilmaami karo baad.

30 Wareysi lagula yeeshay ganacsade degmada Yaaqshiid, Muqdisho, 09 December 2024.

31 Ibid.

# Hababka Canshuur Bixinta

Qeybtan waxay si kooban u iftiiminaysaa in canshuuraha si buuxda loo bixiyo ama in uu jiro gorgortan, haddii rasiit-yada (qoraallo caddeyn ah, haddiiba ay jiraan) ay is keenayaan lacagta la bixiyay, iyo haddii rasiitkaasi uu la mid yahay lacagta la bixiyey, ugu dambeyntiina, hababka lacag bixinta si loo bixiyo canshuuraha.

Ka qeybgaleyaasha daraasadda waxay tilmaameen jiritaanka dakhli canshuuro go'an oo aan gorgortan lahayn iyo kuwo kale oo aan go'nayn oo ay suuragal tahay in ay ka gorgortamaan bixiyaha iyo uruuriyaha. Aragtida ka qeybgaleyaasha waxaa saldhig u ahaa khibraddooda iyo la dhaqankooda canshuur uruuriyeyaasha.

Canshuuraha ay ka qaybgalayaashu ku tilmaameen kuwo go'an oo aan gorgortan lahayn waa canshuuraha hantida maguurtada ah ee diiwaan-gashan. Sida ay sheegeen, milkiilayaasha hantida maguurtada ah ee diiwaan-gashan waa in ay bixiyaan lacagta waajibka ah iyadoo aan la oggolayn wax gorgortan ah. Sikastaba ha ahaatee, waxay sheegeen in canshuur uruuriyeyaasha ay milkiilayaasha hantida maguurtada ah ee aan diiwaan-gashneen labo mid dooransiiyaan: ama inay bixiyaan lacag aad uga yar intii looga baahnaa oo aysan macluumaadka hantida maguurtada ah diiwaan-gelin ama in ay diiwaan geliyaan oo ay bixiyaan canshuurta laga doonayo.

Sikastaba ha ahaatee, ka qaybgalayaashu waxay xuseen halista ku jirta in canshuurta hantida maguurtada ah la siiyo shaqsiyaadka canshuurta uruuriya iyadoo aan caddeyn loo heyn, gaar ahaan haddii uu isla hantidii u yimaado canshuur uruuriye kale oo canshuur doonaya. Sikastaba, sida ay sheegeen, intii lagu jiray wareysi-kooxeedyada, canshuur uruuriyaha wuxuu u ballan qaadaa in uu isagu masuul ka yahay xaafaddaas, iyo in haddii goob kale loo wareejiyo, uu qofka cusub la heshiin doono si uu uga warhaayo milkiilaha. Intaa waxaa dheer, ka qeybgaleyaasha gaar ahaan ganacsatada ayaa sheegay in lacagaha ruqsadda ganacsigu yihiin kuwo go'an, ayna tahay in ay sidaas ku bixiyaan iyagoo aan waqti ku lumin gorgortan.

Dhinaca kale, ka qaybgalayaashu waxay sheegeen in ay jiraan noocyo canshuur oo gorgortan u furan, gaar ahaan oggolaanshaha dhismeyaasha (building permits). Oggolaanshahan waxaa la siiyaa dadka doonaya in ay dhisme dhisaan, biyo-mareen sameeyaan, ama qalabka dhismaha ku kaydiyaan meel ka baxsan goobta dhismaha inta dhismuhu socdo. Ka qaybgalayaal dhisme ku lug lahaa oo oggolaansho ka raadiyay degmada ay khuseyso ayaa sharraxay sida mas'uuliyiinta qaabilsan bixinta oggolaanshaha dhismo ee degmooyin gaar ah marka hore u codsadaan tusaale ahaan $400, balse ugu dambeyn oggolaadaan in la bixiyo $250.

Marka laga hadlaayo canshuur bixinta, ka qaybgalayaashu waxay faahfaahiyeen hababka ay adeegsadaan inay ku bixiyaan. Sida ay sheegeen, canshuuraha sida buuxda loo bixiyo oo aan gorgortanka lahayn waxaa lagu shubaa xisaabaad rasmi ah ee uu Maamulka Gobolka Benaadir ku leeyihiin bangiyada maxalliga ah, gaar ahaan Salaam Somali Bank. Waxay sidoo kale sheegeen in canshuuraha lagu gorgortamo badanaa lagu bixiyo lacag caddaan ahaan iyadoo si toos ah loogu dhiibo canshuur uruuriyeyaasha si looga fogaado islaxisaabtan. Mid kamid ah dhalinyarada ka qaybgalay wareysi-kooxeed ka dhacay Hamar Weyne ayaa yiri:

> *"Canshuuraha oggolaanshaha dhismaha waxaa inta badan lagu qaadaa lacag caddaan ahaan. Marka aad canshuur uruuriyaha weydiiso xisaab bangi oo aad ku shubto lacagta, wuxuu kugu adkeynayaa in aad lacagta caddaan ahaan u dhiibto, isagoo sheegaya in ay tahay in si toos ah loo wareejiyo. Waxay ka baqayaan in haddii lacagta xisaab/account lagu shubo, ay suuragal tahay in la dabagalo si loola xisaabtamo. Tani waa sababta ay ugu adkaystaan in lacagta lagu bixiyo caddaan, si ay qeyb uga qaataan lacagtaas iyaga oo aan wax raad ah ka tagin."*[32]

Intaa waxaa dheer, gacansada waratada ee suuqyada kala duwan ku sugan ayaa sheegay in ay bixiyaan lacagta suuqa maalinlaha ah taasoo u dhexeysa 5,000 ($0.25) iyo 10,000 ($0.42) oo Shilin Soomaali ah. Sidoo kale, ka qeybgalayaashu waxay sheegeen in $10 oo dheeraad ah ay ka dhiibaan canshuurta hantida maguurtada ah, oo lagu diro lambarka taleefoonka masuul ka tirsan degmo. Lacagtan ayaa lagu magacaabay "qoondada horumarinta degmada."

Waxaa sidoo kale muhiim ah, daraasaddu waxay ogaatay in ay jiraan xaalado ay canshuur bixiyeyaasha helaan rasiityo lacagaha ay bixiyeen ah, iyo xaalado kale oo aysan helin. Xaallada hore, ka qaybgalayaashu waxay tilmaameen in marka ay canshuur bixiyeyaasha bixiyaan lacagta oo dhameystiran iyagoo aan wax gorgortan ah gelin—sida inta badan dhacda marka la bixinayo canshuurta hantida maguurtada ah iyo ruqsadda— inay helaan rasiityo uu Maamulka Gobolka Benaadir ku tiimbareysan yahay oo ay tirada lacagta la bixiyay ay isleeyihiin. Dhanka kale, canshuuraha oggolaanshaha dhismooyinka, oo badanaa lagu bixiyo lacag caddaan ahaan, marmar ayaa rasiit la siiyaa. Sikastaba ha ahaatee, ka qaybgalayaashu waxay xuseen in ay jiraan dhacdooyin ay saraakiisha canshuurta uruuriya bixiyaan rasiit-yo ay ku xusan tahay lacag ka yar lacagta la bixiyay. Marka la weydiiyo sababta keentay is-waafajin la'aantaas saraakiisha ayaa sida la sheegay ku jawaaba—marka loo eego jawaabaha ka qeybgaleyaasha daraasadda—in lacagta dheeraadka ah lagu hubinayo in aan laga carqaladeyn shaqada dhismo ee oggolaanshaha loo siiyey, iyo in iyaga la heli karo si ay usoo dhexgalaan haddii loo baahdo.

Sikastaba, dad ayaa sheegay in iyagoo warqad oggolaansho dhisme ka qaatay degmada ay quseyso haddana ay rag hubeysan u yimaadeen iyagoo amar ku bixiyey in dhismaha la joojiyo lacag dheeraad ahna la dhiibo si loo fasaxo dhismaha. Dadkaasi ayaa muujiyay in marka ay askarta tuseen rasiityo aan la tixgelin, iyagoo lagu qasbay in dadka dhismaha masuulka ka ah ay lacag dheeri ah bixiyaan si ay howsha usii wataan.

Ka qaybgalayaasha la macaamilay saraakiisha oggolaanshaha bixisa waxay shaki ka muujiyeen sax ahaanshaha rasiityada iyo in ay lacagta gashay qasnadda dowladda iyo in ay uruuriyeyaasha jeebka ku riteen. Sikastaba ha ahaatee, canshuur bixiyeyaasha qaarkood ayaa la rumeysanyahay inay si hoose ula macaamilaan canshuur uruuriyeyaasha, iyagoo u arka in ay sidaas u fududdahay.

Marka laga yimaado waaya-aragnimada ka qeybgaleyaasha, masuul ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir oo laga wareystay arrinta uruurinta dakhliga canshuuraha ayaa aragtidiisa ku muujiyay in canshuur uruuriyeyaasha ay si qaldan u adeegsadaan awoodda ayna leexsadaan dakhliga loogu talagalay in lagu shubo xasaabaadka rasmiga ah ee maamulka. Tani waxaa qeyb ahaan ugu wacan dulduleello ka jira nidaamka canshuur uruurinta dakhliga ee Maamulka

32 Ka-qaybgale wareysi-kooxeed lagu qabtay degmada Xamar Weyne, Muqdisho, 17kii Noofambar 2024.

Gobolka Benaadir, oo ay canshuur uruuriyeyaashu musuqaan maadaama lacag uruurinta ay ka shaqeeyaan waaxyo kala duwan oo mid walbaa si madax-bannaan u shaqeysa. Intaa waxaa dheer, Maamulka Gobolka Benaadir ma laha maamul dakhli oo dhexe ama xafiis kormeera lana xisaabtama canshuur uruuriyeyaasha. Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu nidaamkan dabacsan awgiis ku lumiyaa qaar ka mid ah lacagaha canshuur bixiyeyaasha lagasoo qaado—oo loo isticmaali karay bixinta adeegyada dadweynaha. Hab-dhaqankan waxa uu qatar ku yahay kalsoonida dadweynaha ee maamulka waxa uuna sii xoojinayaa shakiga ay dadweynuhu ka qabaan canshuur uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir.

# Caqabadaha Heysta Canshuur Uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir

Sida lagasoo xigtay xog-ogaallo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir iyo khubarro maaliyadda dowladda ah oo daraasadan lagu wareystay, qaadista dakhliga canshuurta ee Maamulka Gobolka Benaadir waxaa uu la kulmaa caqabado dhowr ah oo carqalad ku ah hirgelin dhameystiran ee ilaha dakhli canshuur ee jira.

Ugu horreyntii, sida ay xog-ogaallada aan daraasadan ku wareysanay sheegeen, Maamulka Gobolka Benaadir ma laha sharci cad oo aan ahayn awaamiirta maayarrada oo haga dakhli uruurinta. Xaaladdan waxay ka dhalatay maadaama maqaamka Gobolka Benaadir uu weli yahay mid aan la go'aamin, taasoo xaddideysa awoodda Maamulka Gobolka Benaadir ee uruurinta dakhliga kasoo xarooda caasimadda. Tani waxay weli caqabad ku tahay Maamulka Gobolka Benaadir sida lagu caddeeyay qeybta qaab-dhismeedka sharciga ee daraasadda ee ku saabsan uruurinta dakhliga ee Maamulka Gobolka Benaadir.

Midda labaad, hay'ado aan ahayn dowladda federaalka iyo Wasaaradda Maaliyadda ayaa la tartama Maamulka Gobolka Benaadir si ay u helaan awood ay dakhli canshuur uga uruuriyaan gobolka Benaadir. Hay'adahaas la sheegay waxaa ka mid ah Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (HSNQ), oo lacagaha oggolaanshaha ka uruurisa kireystayaasha iyo milkiileyaasha dhulka marka ay heshiis kiro kala saxiixanayaan; iyo booliska iyo maamullada degmooyinka oo uruuriya lacago loogu yeero taakulada hormarinta degmada iyo, mararka qaarna, lacagaha oggolaansha dhismaha. Masuul sare oo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa sheegay in lacagaha ay uruuriyaan hay'adahaasi aysan ku dhicin xisaabaadka Maamulka Gobolka Benaadir. Intaas waxaa dheer, kooxo hubeysan ayaa si qasab ah dadka deegaanka lacago uga qaada, taasoo kor u qaadaysa culayska canshuurta ee saaran dadka, waxayna sii adkeyneysaa xaaladda maamul.

Midda saddexaad, awoodda duqa magaalada mararka qaar kuma baahsana magaalada. Sida uu sheegay masuul ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir, arrintan waxay dhacdaa marka waaxyaha canshuur uruurinta ee heer gobol iyo heer degmo ay ku murmaan cidda xaqa u leh uruurinta canshuuraha qaar. Waxaa la sheegaa in duqa magaalada uusan awoodin inuu go'aamiyo cidda xaqa u leh uruurinta canshuurahaas.

Midda afaraad, wacyiga bulshada ee hooseeya ayaa ah caqabad weyn oo hortaagan uruurinta dakhliga ee dalka oo dhan, taasoo sidoo kale Maamulka Gobolka Benaadir dhibaato ku ah. Sida lagu xusay qeybta wacyigelinta bulshada ee warbixintan, dadka deegaanka ma fahamsana noocyada canshuuraha, saamiga lagu qaado, iyo hay'adda xaqa u leh uruurinteeda—Maamulka Gobolka Benaadir mise Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka. Wacyi la'aantan waxaa qeyb ahaan sababay xiriir iyo xog la'aan Maamulka Gobolka Benaadir iyo dadweynaha ee arrimaha canshuurta iyo maqnaashaha dukumiintiyo dadweynuhu heli karaan oo ku saabsan noocyada canshuuraha iyo saamigooda.

Midda shanaad, kalsooni la'aanta dadka ee dowladda ayaa sidoo kale ah caqabad weyn oo hor istaagaysa dadaallada dakhliga uruurinta. Dadku waxay ka shakisan yihiin sida Maamulka Gobolka Benaadir uu u maamulo dakhliga uu qaado, waxayna aaminsan yihiin in canshuuraha aan loo isticmaalin adeegyo dadweyne balse loo adeegsado ujeedooyin kale.

Midda lixaad, go'aanka Maamulka Gobolka Benaadir ee adeegsiga askar hubeysan si ay u uruuriyaan canshuurta ayaa waxay dadweynaha ku sababtay inay ka caroodaan dhibaatooyinka loo geysto awgeed mararka qaarna xadgudubyo ay canshuur uruuriyeyaasha kula kacaan shacabka. Masuuliyiin ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa awood u adeegsiga canshuur uruurinta ku tilmaamay in ay ka dhalatay u hoggaansanaan la'aan canshuur bixinta.

Midda toddobaad, xirnaashaha mararka qaar ee wadooyinka—oo ah qayb ka mid ah amniga marka madaxweynaha federaalka uu imaanayo ama baxayo ama marti ajnabi oo maqaam sare leh ay imaanayaan magaalada—ayaa carqaladeysa dakhli uruurinta. Tusaale ahaan, masuul ka tirsan waaxda adeegyada ruqsadaha ganacsi iyo diiwaangelinta shirkadaha bixisa ayaa sheegay in waaxdu ay lumiso ilaa $10,000 marka waddooyinka la xero.

Midda siddeedaad, Maamulka Gobolka Benaadir wuxuu la daalaa dhacaa gaabis dhinaca uruurinta dakhliga canshuuraha ah maadaama uusan canshuur ka uruurin karin degmooyinka daafaha ku yaalla oo ay ugu wacan tahay caqabado amni oo ka jira. Inkastoo amniga uu si guud usoo hagaagay, ilo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa sheegay in wali uu yahay caqabad marka la barbar dhigo degmooyinka ku yaalla gudaha. Masuuliyiin ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ayaa xusay in saraakiil canshuur uruuriyeyaal ah ay kooxo hubeysan soo weerareen laguna dilay duleedka magaalada, kuwa kalena ay dadka deegaanka oo mindiyo adeegsanaya soo weerareen ayna dhaawacyo gaarsiiyeen iyagoo canshuur uruurinaya.

Midda sagaalaad, xirfadaha farsamo oo yar ayaa sidoo kale ah caqabad wiiqeysa in Maamulka Gobolka Benaadir uu si hufan u uruuriyo canshuuraha. Ilo wareedyo ayaa tilmaamay in shaqaalaha canshuur uruurinta aysan haysan xirfadaha lagama maarmaanka u ah shaqada islamarkaana aysan helin tababarro lagu horumariyo shaqadooda.

Midda tobanaad, Maamulka Gobolka Benaadir ma laha nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladda (PFM) oo loogu talagalay dakhliga iyo kharashka, si ka duwan Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Goboleedyada, si sare loogu qaado isla xisaabtanka maaliyadeed. Maqnaanshaha nidaamkan ee Maamulka Gobolka Benaadir ayaa la rumeysanyahay in ay la xiriirto rabitaan la'aan dhanka hoggaanka dowladda federaalka iyo Maamulka Gobolka Benaadir, kuwaasoo doorbidaya inay maaliyadda Maamulka Gobolka Benaadir u adeegsadaan in uu u ahaado lacago ay siyaasad u isticmaalaan. Haddii la hirgelin lahaa nidaamkan, waxaa adkaan lahayd in dhaqamadaas ay sii socdaan, sababo la xiriira suurtagalnimada in hay'adaha deeq bixiyeyaasha sida Bangiga Adduunka iyo IMF ay la xisaabtamaan korna kala socdaan. Sidoo kale, Maamulka Gobolka Benaadir waxa aanu lahayn waax miisaaniyadeed oo diyaarisa misaaniyad sanadeedka maamulka.

Wadarta caqabadahaan waxay wiiqayaan in la helo canshuur uruurin hufan, isla xisaabtan, iyo adeeg bixin. Caqabadahan ma aha kuwo cusub balse waxay soo jireen tan iyo markii Maamulka Gobolka Benaadir uu dib u billaabay dakhli uruurinta. Sikastaba ha ahaatee, maamulladii hore ma aysan lahayn dadaalo hal-abuur dhab ah iyo hoggaan si loo aqoonsado caqabadahaasi ama loo helo xalal wax-ku-ool ah. Gobolka Banaadir wuxuu leeyahay awood weyn oo dhinaca dakhliga ah, balse wuxuu u baahan yahay hoggaan karti leh oo ka faa'iideysan kara awooddaas iyadoo la xallinayo caqabadaha jira, islamarkaana aan sugaynin in maqaamka gobolka si buuxda loo caddeeyo.

# Gunaanad

Daraasaddan waxay baaritaan ku samaysay dakhli uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir, iyadoo si gaar ah diiradda u saartay shuruucda jirta (ama maqan) ee saldhigga u ah dakhli uruurinta, noocyada iyo ilaha canshuuraha Maamulka Gobolka Benaadir, sida dakhligaas loo uruuriyo, hab-dhaqanka shaqaalaha canshuuraha uruuriya, iyo caqabadaha ka hor imaanaya dakhli uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir.

Daraasadda waxay ogaatay in Maamulka Gobolka Benaadir aanu lahayn shuruuc qeexan oo sharciyeynaya howlaha dakhli uruurinta. Tani waxay qeyb ahaan ka dhalatay maqaamka Gobolka Benaadir oo aan caddeyn iyo maqnaanshaha xeer qeexa maqaamka Muqdisho ee uu diyaariyay Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, taasoo keentay in uu jiro daldaloollo sharci, maadaama Maamulka Gobolka Benaadir uu weli hoos joogayo dowladda federaalka ilaa laga gaaro go'aan rasmi ah oo ku saabsan maqaamkiisa maamul. Intaas waxaa dheer, Maamulka Gobolka Benaadir waxa uu hadda uruuriyaa dhowr nooc oo dakhliga canshuuraha ah, iyadoo waaxyo kala duwan oo ka tirsan Maamulka Gobolka Benaadir ay masuul ka yihiin uruurintooda. Sidoo kale, labo shirkadood oo gaar loo leeyahay ayaa loo xilsaaray inay uruuriyaan canshuuraha dhulka iyo hantida.

Daraasaddu waxay soo bandhigtay caro xooggan oo ay dadka deegaanka ka muujiyeen hab-dhaqanka shaqaalaha uruuriya canshuuraha, iyadoo aan weli la hirgelin wax nidaam cabasho ah. Inkastoo Maamulka Gobolka Benaadir uu canshuuro uruuriyo, haddana waxaa aad u yar adeegyo dadweyne oo muuqda oo laga helo canshuuraha la bixiyo, taasoo keentay in dadka deegaanka ay si isa soo taraysa uga niyad-jabaan. Daraasaddu waxay sidoo kale iftiimisay caqabado waaweyn oo heysta nidaamka dakhliga canshuuraha ee Maamulka Gobolka Benaadir, kuwaasoo xaddidaya awoodda maamulka ee ah inuu si buuxda u maareeyo ilaha dakhli ee hadda jira.

# Talooyin Tixgelin Mudan

Daraasaddan waxay soo bandhigaysaa talooyin loogu talagalay in ay ogeysiiyaan oo ay hagaan maamulka gobolka iyo daneeyayaasha kale ee ay khuseeyso si ay u xalliyaan arrimaha muhiimka ah ee la xiriira dakhli uruurinta Maamulka Gobolka Benaadir ee u baahan u fiirsasho dhab ah. Gobolka Benaadir waxa uu ka dambeeyaa dadaallada lagu dhisayo hay'adaha laguna horumarinayo maareynta maaliyadda dowladda. Xaaladda maaliyadeed ee Maamulka Gobolka Benaadir waa la xalin karaa marka lagasoo tago qeexidda maqaamka Muqdisho, oo weli sugeyso sharci wadajir ah oo ay soo saaraan labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka. Sidaas darteed, daraasaddu waxay soo bandhigeysaa talooyinkanka soo socda:

- **Faafinta Macluumaadka Maaliyadda Dowladda:** Maamulka Gobolka Benaadir waa in uu faafiyo macluumaadka ku saabsan dakhliga dowladda hoose, sida liiska ilaha dakhli iyo saamiga canshuuraha, iyadoo adeegsaneysa mareegta gobolka, baraha bulshada, iyo warbaahinta gudaha. Tani waxay ka ilaalinaysaa muwaadiniinta in ay khiyaaneeyaan canshuur uruuriyeyaasha oo ay bixiyaan canshuur ka badan inta looga baahan yahay. Sidoo kale, Maamulka Gobolka Benaadir waa in uu si cad u shaaciyaa akoonnada rasmiga ah ee laga doonayo in canshuur bixiyeyaasha ay ku diraan lacagaha si loo yareeyo musuqmaasuqa iyo lacago si gaar ah loo leexsado. Maamulka Gobolka Benaadir sidoo kale waa in uu dadweynaha la wadaago sida lacagtooda loo isticmaalayo. Tani waxaa lagu gaari karaa in la sameeyo misaaniyad sanadle ah oo ay dadweynuhu heli karaan, oo u oggolaaneysa in ay la socdaan kharashaadka.

- **Tartan Furan in Loo Galo Qandaraasyada Maamulka Gobolka Benaadir:** Maamulka Gobolka Benaadir ayaa la sheegay in uu qandaraasyo siiyay shirkado kala duwan oo adeegyo bixiya sidoo kalena mashuurcyo hirgeliya iyadoo aan loo marin nidaam qandaraas bixin oo daahfuran. Waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu hirgeliyo hab-raacyo tartan furan oo hufan, si shirkado badan ay si caddaalad ah ugu tartamaan qandaraasyada, iyagoo aan laaluush bixin. Maqnaanshaha daah-furnaanta ee bixinta qandaraasyada, gaar ahaan kuwa dhismaha waddooyinka, waxay keentay in la dhiso laamiyo tayo liita oo si dhakhso ah u burbura marka roob da'o.

- **Xakamaynta Hab-Dhaqanka Canshuur Uruuriyeyaasha:** Maamulka Gobolka Benaadir waa in uu qaado tallaabooyin dhab ah oo wax-ku-ool ah si loo hago hab-dhaqanka shaqaalaha canshuuraha, kuwaasoo tabashooyin iyo cabsi ka dhex abuuray shacabka. Marka la eego xaaladda amniga, Maamulka Gobolka Benaadir waa in uu yareeyo u adeegsiga booliska hubeysan ee canshuur uruurinta, maadaama shacabka ay ku sheegaan cabsi-gelin iyo handadaad. Waa in shaqaalaha ku lugta leh si taxaddar leh loo xusho si loo dhiso kalsoonida dadweynaha ay ku qabaan maamulka. Sidoo kale, shaqaalaha rayidka ah ee canshuuraha uruuriya waa in dib loo qiimeeyo. Maamulka waa in uu dejiyo nidaam akhlaaqeed cad oo lagula xisaabtamo kuwa ku xadgudba muwaadiniinta. Waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu sidoo kale howsha uruurinta canshuuraha u dhiibtaa dhallinyarada jaamacadaha ka qalin jebiyay ee mushaarka ka qaata maamulka, kuwaasoo si xirfad leh ula falgeli kara dadweynaha oo kor-u-qaadi kara sumcadda maamulka. Tani waxa ay u baahan tahay barnaamij

tababar gaar ah oo lagu kobcinayo xirfadooda ayna ku xallin karaan caqabadaha soo kordha xillliga uruurinta canshuuraha.

- **Sameynta Taleefoon Cabasho (Hotline):** Dadka deegaanka waxay qabaan tabashooyin badan oo la xiriira hab-dhaqanka shaqaalaha canshuuraha uruuriya, balse ma jiro nidaam rasmi ah oo ay tabashadooda ku gudbiyaan. U abuuridda taleefoon (ama nidaam tabasho oo online ah) ayaa dadka deegaanka u oggolaanaya inay ku soo gudbiyaan tabashooyinkooda, laguna qaado tallaabooyin sharciyeed cid kasta oo masuul ka ah xadgudub ama dhibaato.

- **Kor-u-qaadista Wacyiga Dadweynaha ee Canshuuraha:** Daraasaddu waxay ogaatay in dadka deegaanka ay faham xaddidan ka haystaan canshuuraha Maamulka Gobolka Benaadir iyo sharciyada lagu maamulo. Waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu dadweynaha gaaraa isadoo adeegsanaya kulamo furan, xarumo cilmibaaris, iyo warbaahinta si kor loogu qaado wacyiga ku saabsan canshuuraha Gobolka Benaadir.

- **Sameynta Keyd-Xogeed La isku Halayn Karo ee Hantida Maguurtada Ah:** Sameynta keyd-xogeed dhameystiran oo hantida maguurtada ah waxay hage sugan siin doontaa shaqaalaha canshuuraha. Tani waxay u sahli doontaa in Maamulka Gobolka Benaadir uu si hufan ula socdo hantida laga bixiyay canshuuraha iyo kuwa aan laga bixin, taasoo yareyn doonta musuqmaasuqa iyo lunsashada canshuuraha. Sidoo kale, waxay difaaci doontaa dadka kiraysteyaasha si aan si qaldan loogu qabsan canshuur aysan masuul ka ahayn bixinteeda.

- **Qaadashada Nidaamka Maamul Maaliyadda Dowladda:** Maamulka Gobolka Benaadir hadda kuma shaqeyso nidaamka maamulka maaliyadda dowladda oo ay adeegsadaan dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, nidaamkaasoo xoojiya hufnaanta iyo isla-xisaabtanka. Maamulka Gobolka Benaadir waa in uu qaato nidaamkan si uu ula socdo dakhliga soo xarooda iyo kharashaadka. Tani waxa ay Maamulka Gobolka Benaadir u oggolaaneysaa in uu la socdo inta uu si bille ama sanadle ah usoo xareeyo iyo sida loo isticmaalo dakhligaas.

- **Dib-u-habeynta Qaab-dhismeedka Uruurinta Dakhliga**: Dakhliga Maamulka Gobolka Benaadir waxaa hadda uruuriya xafiisyo badan oo kala duwan. Waxaa lagama maarmaan ah in la mideeyo nidaamkan oo la dhiso kaliya hal xafiis oo masuul ka ah uruurinta dhammaan canshuuraha Maamulka Gobolka Benaadir. Sidoo kale, waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu dib-u-qaabeeyo qaab-dhismeedka waaxda kharashaadka, oo uu dhiso waax miisaaniyadeed sidoo kalena uu hirgeliyo nidaam lagu maamulo kharashaadka iyo xisaabaadka.

- **In La Dhiso Hay'ado Isla-Xisaabtan:** Si wax looga qabto caqabadaha isla-xisaabtanka ee la xiriira dakhliga iyo kharashaadka, waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu dhisaa hay'ado sida Xafiis Hantidhawr madax-bannaan, Xafiiska Xakameynta Gudaha, iyo Xisaabiyaha Guud. Hay'adahani waa in ay si dhab ah uga shaqeeyaan hubinta in dakhliga la uruuriyo loona isticmaalo si waafaqsan xeerarka, iyo in qandaraasyadu si cadaalad ah loo bixiyo. Hay'adahani waa in aysan noqon wax indhaha dadweynaha lagu qanciyo oo kaliya balse waa in ay si dhab ah u gutaan waajibaadkooda. Tani

waxa ay u baahan tahay rabitaan siyaasadeed oo xooggan oo ka yimaada hoggaanka Maamulka Gobolka Benaadir.

- **Isticmaalka E-Governance ee Uruurinta Canshuuraha:** waa in Maamulka Gobolka Benaadir uu tixgeliyaa adeegsiga nidaamyada teknoolaji ee adeegyada badan ee uu bixiyo. Tani waxay yareyn kartaa culeyska shaqada, musuqmaasuqa, iyadoo ka hortageysa dakhliga khasaaraya, waxay muwaadiniinta u ilaalineysaa waqti iyo lacag, waxay kordhineysaa qanacsanaanta, waxayna yareyneysaa dadka ka faa'iida nidaamka dheer ee aan waxtarka lahayn. Sidoo kale waxay kordhin kartaa kalsoonida dadweynaha iyadoo hormarineysa dakhliga gudaha.

- **Mudnaan-siinta Bixinta Adeegyo Dadweyne oo La Taaban Karo:** Sida ay daraasaddu muujisay, dadweynuhu waxay aaminsan yihiin in Maamulka Gobolka Benaadir aanu dakhliga uu qaado u isticmaalin bixinta adeegyo la taaban karo sida caafimaadka, waxbarashada, iyo baahiyaha aasaasiga ah. Maamulka Gobolka Benaadir waa in uu si gaar ah mudnaanta u saaraa sidii uu qeyb dakhligiisa kamid ah ugu qoondeyn lahaa adeegyada dadweynaha taasoo faa'iido u leh canshuur bixiyeyaasha. Tani waxa ay dhiiragelineysaa u hoggaansanaanta canshuurta waxa ayna hormarineysaa sumcadda maamulka.

# Tixraac

BBC, 2023. *Maxkamad Ciidan oo dil ku xukuntay askari nin rayida u dilay shan kun oo shilin Soomaali ah*. [Online] Available at: https://www.bbc.com/somali/live/war-64273858 [Accessed 16 April 2025].

Dalsan Radio, 2023. *Askari Shan Kun oo Shilin Soomaali ah darteed Qof Shacab ah ugu dilay Muqdisho.* [Online] Available at: https://www.radiodalsan.com/askariga-shan-kun-oo-shilin-soomaali-ah-darteed-qof-shacab-ah-ugu-dilay-muqdisho/ [Accessed 16 April 2025].

Elmi, A. A. & Ali, F. N., 2024. *Mogadishu: City report.* [Online] Available at: https://www.african-cities.org/wp-content/uploads/2024/08/ACRC_Working-Paper-20_August-2024.pdf [Accessed April 2025].

VOA, 2024. *Saddex degmo oo cusub oo lagu kordhiyey gobolka Banaadir.* [Online] Available at: https://www.voasomali.com/a/saddex-degmo-oo-cusub-oo-lagu-kordhiyey-gobolka-banaadir/7619262.html [Accessed April 2025].

# Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Somali Public Agenda waxa ay aaminsan tahay in dhammaan dadka Soomaaliyeed ay mudan yihiin adeegyo bulsho oo wanaagsan oo ay kamid yihiin helitaan waxbarasho la awoodi karo, daryeel caafimaad, guri, amni iyo caddaalad ee uu bixiyo maamul hufan oo lala xisaabtamo.

## Howlaha Aan Qabanno

**Cilmibaaris:** Somali Public Agenda waxa ay ka qeyb qaadataa sare-u-qaadista fahamka iyo hagaajinta maamulka dowliga ah ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cilmibaaris iyo falanqeyn lagu sameeyo arrimo kala duwan oo saameeya siyaasadda dowladda iyo bixinta adeegyada bulshada. SPA waxay si joogto ah u daabacdaa daraasado iyo faallooyin (oo intooda badan ku qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska) falanqeeya maamul-daadejinta iyo dowladaha hoose; dimuqraadiyeynta iyo doorashooyinka; maamulka maaliyadda; amniga, cadaaladda, iyo ku dhaqanka sharciga; qorsheynta magaalooyinka iyo maamulka dhulka; shaqada; iyo, nidaamka waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka. Qoraalladani waxay inta badan macluumaad iyo falanqeyn ka siiyaan muwaadiniinta, siyaasad-dejiyeyaasha, aqoonyahannada iyo beesha caalamka arrimaha dowlad-dhisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya.

**Wadahadal:** Public Agenda Forum waa madal iyo goob lagu falanqeeyo arrimaha dowlad-shisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya. Madashu (oo ay ku jiraan kulamo bille ah oo loo yaqaanno Gaxwo & Gorfeyn) waxaa loogu talagalay in lagu gorfeeyo arrimaha muhiimka ah ee mudnaanta u leh bulshada. Qeybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan cilmibaarayaal, siyaasad-dejiyayaal, iyo xirfadlayaal ayaa lagu martiqaadaa inay si siman u lafaguraan arrimaha laga doodayo. Public Agenda Forum waxay qabanqaabisaa wadahadallo lala yeesho siyaasiyiinta iyo dadweynaha waxayna abaabushaa aqoon-is-weydaarsiyo, siminaaro, iyo bandhigyo buugaag iyo daraasado. Inta badan qodobbada kasoo baxa doodaha Madasha waxay macluumaad ku biiriyaan faallooyinka Somali Public Agenda.

**Naqshadeynta Adeegyada Bulshada:** Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka iyo talooyinka daraasadaheena, waxaan innagoo kaashaneyna hay'adaha ay khuseyso naqshadeynaa siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda innagoo adeegsaneyna SPA Policy Lab. Innaga oo kaashaneyna siyaasad-dejiyeyaasha, shaqaalaha rayidka, iyo bulshada, waxaan u naqshadeynaa adeegyada dadweynaha si aqoon ku dhisan. Kahor inta aanay dowladdu maalgelin siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda la qorsheeyay, waxaan ka caawinnaa in lagu tijaabiyo adeegga la naqshadeeyay heer yar si loo fahmo waxtarka adeegyada la naqshadeeyay.

**Tababar:** Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka cilmibaaristeena iyo naqshadeynta aan sameyno, Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ee Somali Public Agenda waxay bixisaa koorsooyin tababar gaaban si gacan looga geysto dhisidda kaadir maamul oo fulin kara siyaasadaha iyo barnaamijyada. Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ujeeddadeedu waa in lagu xiro shaqaalaha rayidka ah, siyaasiyiinta, iyo shaqaalaha hay'adaha aan macaash doonka ahayn bulshada iyo in la siiyo maamullada xirfadaha farsamo ee lagama maarmaanka u ah diyaarinta iyo hirgelinta xalalka caqabadaha adeegga dadweynaha ka jira. Intaa waxaa dheer, xaruntu waxay siisaa tababaro xirfadlayaal Soomaali ah gaar ahaan kuwa xiiseynaya inay ku biiraan dowladda iyo sidoo kale xirfadlayaasha ku howlan adeegyada bulshada iyo hay'adaha aan macaash doonka ahayn.

Better Governance, Brighter Somalia

Somali Public Agenda
Mogadishu
Somalia
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>